# CILMIGA BULSHADA

Tilmaame Bare

Fasalka 8aad

ISBN 978-99944-2-121-3

JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 47.60

CILMIGA BULSHADA Tilmaame Bare Fasalka 8aad

MOE

# CILMIGA BULSHADA

Tilmaame Bare

Fasalka 8aad



JAMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA ITOOBIYA

WASAARADDA WAXBARASHADA

# CILMIGA BULSHADA

## TILMAAME BARE

### FASALKA 8[AAD]

**Qorayaasha Tafatirayaasha:**

Cali Muxumed Bakaal
Cabdlcasiis Maxamed Aadan(Baaruud)

**Qiimeeyayaasha:**

Maxamed Cabdi Roble
Maxamed Bade Maxamuud
Deeq Axmed Badal

**JAMHUURIYADA DIMUQRAADIGA FEDARAALKA ITOOBIYA, WASAARADA WAXBARASHADA**

Wasaarada waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Fedaraalka Itoobiya mashruuca hoos yimaad ee uqaybsan kor u qaadista iyo horumarinta tayada waxbarashada Guud oo taageero ka helay hayada IDA Credit No. 4535 ET oo ah the Fast Track Initiative catalytic fund iyo dawladaha Finland, Italy, Netherland iyo United Kingdom.

© 2011 wasaarad waxbarashada ee jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya. Xuquuqda buuggani way u dhawsan tahay wasarada waxbarade ee JDFI. Buugga ama qayb ka mid ah buugga lama guurin karo lama daabici karo lamana baahin karo, iyada oo la adeegsanayo qalabyada eletirooniksa iyadoo ogolaansho qoraal ah aan laga haysanin wasaaradda waxbarashada ama liisan ka saamaxaya xeerka qodobka No. 4/0/2004 ee xuquuqda daabaca oo ah maqaal ay jumhuriyada Dimoqraaidiga Fedaraalka Itoobiya.

Wasaaradda waxbarashadu waxay u mahad naqaysaa shakhsiyaadka iyo kooxaha si toos ah iyo si dadban uga qayb qaatay daabicista iyo soo saaridda buuggan.

Kuwa haysta ogolaashaha qoraalka laakiin lagu eedeeyo inay gaf ka galeen xuquuqda buugga. Waa in ay la xidhiidhaan xafiis waynaha wasaaradda Waxbarashada ee ku taala Arata kiilo, Adiss Ababa, Itoobiya.

***Waxaa Soo saray oo daabacday***

STAR EDUCATIONAL BOOKS DISTRIBUTORS Pvt. Ltd.

24/4800, Bharat Ram Road, Daryaganj,

New Delhi – 110002, INDIA

**iyo**

ASTER NEGA PUBLISHING ENTERPRISE

P.O. Box 21073

ADDIS ABABA, ETHIOPIA

*Under GEQIP Contract No. ET-MoE/GEQIP/IDA/ICB/G-07/09-B.*

ISBN 978-99944-2-121-3

# Tusmada Buuga

## Cutubka 1aad

**Dunidan Aynu Ku Nool Ahay** 1

1.1 QAARADAHA ........................................ 6

1.2 DADYAWGA DUNIDA ........................................ 12

1.3 HAB-NOLOLEEDKA IYO BAAHSANAANTA DADKA ........................................ 17

## Cutubka 2aad

**xoogaga Wax Ka Badala oogada Sare ee dhulka**........................................42

2.1 XOOGAGA GUDAHA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA ........................................ 42

2.2 XOOGAGA DIBADA IYO SAAMAYNTOODA NOLOSHA AADMIGA ........................................ 45

2.3 CABBIRKA FOGAANTA IYO BEDKA KHARIIRADA KORKEEDA ........................................ 48

# CUTUBKA 3AAD

## Saameynta Aadamuhu Ku Leeyahay deegaanka 54

**3.1** XIDHIIDHKA AADAMIGU LA LEEYAHAY KHAYRAADKA DABIICIGA ........ 54

**3.2** WAXYAABAHA SABABA KULULAANSHAHA DUNIDA IYO SAAMAYNTOODA ........ 59

# CUTUBKA 4AAD

## Arimaha Dadwaynaha 65

**4.1** ARIMAHA LA XIDHIIDHA DADWAYNAHA........65

**4.2** XUQUUQAHA AADMIGA IYO KA BADBAADIDA SHILALKA ........ 70

**4.3** BARNAAMIJYADA ISKAASHIGA ........ 74

**4.4** CAALAMIYAYNTA ........ 77

Muqaraka fasalka 8aad ee Cilmiga Bulshada........ 80

# CUTUBKA 1 DUNIDAN AYNU KU NOOLAHAY

## HORDHAC

Ardaydu waxay u baahan yihiin inay ogaadaan waxa ka dhacaya waddankooda iyo gebi ahaanba dunida. Qaybta hore waa ogaanshaha dunideena, iyo fahamka, halka ay goobuhu dhacaan. Waa fududahay inay ku guuldaraystaan (fashilmaan) garashada dadyawga kale ee aadamiga ah waa marka xataa aynaan garanayn meesha ay ku nool yihiin. Khariiraduhu waa kuwo lagama maarmaan u ah fahankeena bulsho, dhaqaale, cabbiraada Juqraafiyadeed ee dunidan aynu ku nool nahay waa:

Barashada juqraafigu waa ta ogaal u oomanaha aadamigu ka shidaal qaato. Waa maxay sababta ay goobaha (Meelaha) dhulka dushiisa sida cajiibka ah ugu kala duwan yihiin midba midka kale? Shanta su'aalood ee ugu muhiimsan ee kaa caawin kara habaynta macluumaadka ku saabsan goobaha waa:

1. Waa maxay meesha ay meeli dhacdo?
2. Waa maxay dabeecada ay meeli leedahay?
3. Sidee bay dadku u dhex galaan deegaanka dabiiciga ah ee meel?
4. Sidee bay dadka, badeecadaha iyo afkaartu u dhex socdaan goobaha (meelaha)?
5. Sidee bay goobuhu ula mid yihiin uguna kala duwan yihiin meelaha kale?

Suaalahan waxaa loo yaqaanaa mawduuca (dulucda) shanta juqraafi iyo suaalaha furayaasha ah oo kaa caawin doona habaynta casharadaada cutubkan. Waxaa muhiin ah sidoo kale in la sameeyo soo koobid iyo qiimayn ku salaysan shanta mawduuc ee juqraafiga.

**Qaarkamid ah hababka inaad ardaydaada ku siiso dunida:**

- u tilmaan ardayda in juqraafigu yahay meel kasta.
- u keen (khariirad i.w.m) korna ugu qaad
- ka tus ardayda khariidada korkeeda dalalka aynu deriska nahay
- sahami meeraha lsticmaala Tignoolojiga (oo ah dhulka)
- uga samee juqraafi qaybaha laan kasta
- U samee wax ka baxsan casharada buugga ku yaalla.
- Ardayda ku xidhiidhi dadyaw ka kala yimid waddamo iyo dhaqamo kale.
- Ka caawi ardaydu inay sawiran karaan mustaqbalkooda.

## Ujeeddooyinka Cutubka

***Marka uu dhamaado cutubkani ardaydu waxa ay awoodi doonaan inay:***

- *Sharaxaan halka ay dhacaan deris ahaan, baaxada iyo muuqaalada ugu muhiimsan ee qaaradaha.*
- *Kala saaraan muuqaalada berriga ugu muhiimsan sida: Buuraha, Bannaanada, Dooxooyinka, webiyada, Haraha i.w.m.*
- *aqoonsadaan luuqadaha ugu waawayn dunida iyo meelaha sida qaalibka ah loogaga hadlo dunida.*
- *aqoonsadaan meelaha ay dadku ku yar yihiin iyo meelaha ay ku badan yihiin ee dunida.*
- *Fahmaan baahsnaanta tirada dadka islamarkaana cabbiraan heer deegaan ilaa heer caalami iyo isbadalada ka socda..*
- *Aqoonsadaan armiha dabiici ee saamaynta ku leh gobolada kala duwan ee ay dadku degen yihiin.*
- *Aqoon u yeeshaan noocyada kala duwan ee ugu waawayn ee dhaqdhaqaaqyada dhaqaale ama hab-nololeed ee ka jira qaybaha kala duwan ee dunida.*
- *Aqoonsadaan diimaha ugu waawayn ee dunida iyo baahsanaantooda.*
- *Sharaxaan taariikhda, curashadii iyo saamayntii iyo kacaankii warshadaha.*

- *Faahfaahiyaan sababihii keenay gumaystayaasha Afrika iyo saamayntoodii*
- *Garwaaqsadaan Halgankii taariikhiga ahaa ee ay dadyawgii Afrikaan ka ahaa soo galeen ee iska caabintii gumaystayaasha.*

## Tusmooyinka ugu muhiimsan ee cutubka 1aad

***(Wadarta xiisadaha loo qoondeeyay cutubka 1aad oo ah 25 xiisadood)***

1.1 Qaaradaha
1.2 Dadyawga dunida
1.3 Baahsanaanta tirada dadka iyo habnololeedka
1.4 kacaankii warshadaha iyo saamayntiisii

| **Casharka** | **Clnwaanka** | **Ujeeddada gaarka ah** | Xiisadaha | Boga buuga ardayga | Boga buuga baraha | Agabka |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.1 | Qaaradaha | • bartaan halka ay dhacaan qaaraduhu iyo baaxadoodaba<br>• aqoon u yeeshaan muuqaalada ugu waawayn ee ay qaaraduhu leeyihiin<br>• kala gartaan fiiqyada ugu dhaadheer iyo meelaha ugu jooga hooseeya qaaradaha<br>• Aqoonsadaan haraha iyo webiyada ugu waawayn dunida | 3 | | | |
| 1.2 | Dadyawga Dunida | • Aqoonsadaan luuqadaha ugu waawayn ama caansan ee lagaga hadlo dunida<br>• Sharaxaad ka bixin karaan qaabka loogu | 6 | | | |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | dhaqmo diin goob ka mid ah dunida<br>• Qeexaan diin iyo sababta ay dadku ugu dhaqmaan<br>• Taxaan diimaha ugu w/wayn dunida<br>• Tilmaamaan, adeegsadaana khariidadaha meesha diimaha ugu w/wayn ee lagaga dhaqmo ee dunida.<br>• Aqoon u yeeshaan guulihii ugu waawaynaa ee ay ilbaxnimooyinkii hore gaadheen isla markaana ay ku soo kordhiyeen dunida ee wakhtigan casriga ah loo aayay. | | | | |
| 1.3 | Baahsanaanta tirada dadka iyo hab-nololeedka | • Sharaxaan qaybaha ama naqshadaha baahsanaanta dadka ee gobolada ugu gobolada kala duwan dunida<br>• Fahmaan sida dadyawga qaybaha kala duwan ee dunidu u kasbadaan hab-nol oleedkooda. | 3 | | | |
| 1.3.1 | Meelaha ay dadku ku yar yihiin iyo meelaha ay ku badan yihiin ee dunida | • Aqoonsadaan qaar ka mid ah meelaha ay dadku ku badan yihiin iyo meelaha ay ku yar ylhiin ee dunida kana khariirada dunida korkeeda | 3 | | | |
| 1.3.2 | Sababaha dhaliya kala duwanaan-shaha baah-sanaanta tirada dadka | • Sharaxaad ka bixiyaan sababta ay meelaha qaarkood dadku ugu cufan yihiin, meelaha qaarkoodna teel-teelka u yihiin. | | | | |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1.3.3 | Kala duwana anshaha habnololeedka qaybaha dunida | • Sharaxaan arimaha muuqaal iyo aadmi ee saamaynta ku leh baahsanaanta dadka<br>• Faahfaahiyaan noocyada hab-nololeed ee ka jira qaybaha kala duwan ee dunida | 2 | | | |
| 1.4 | Kacaankii warshadaha iyo saamayntiisii | • Garwaaqsadaan sida iyo meeshii kacaankii warshaduhu ka bilaab-may<br>• Sharaxaad ka bixiyaan saamayntii kacaankii warshadaha sida in dalal la gumaysto magaalooyin samaysmaan waddan jacaylkii (wadaniyadii) i.w.m,<br>• Fahmaan isbalaadhintii fikradihii cusbaa ee soo if baxay sida xoriyadnimada iyo Dimoqraadiyada.<br>• Fahmaan abuuritaankii iyo sababihii ugu w/waynaa ee dhaliyay gumaysiga<br>• Fahmaan iska caabintii ay Afrikaanku kaga soo horjeedeen isbalaadhintii gumaysiga<br>• Aqoonsadaan waddankii Afrikaanka ahaa ee gumaystay isla wadan Afrikaan ah<br>• Sharaxaan sababihii ugu waawaynaa ee dhaliyay iyo saamaynadii Dagaalaadii dunida ee I iyo II | 7 | | | |

# 1.1 Qaaradaha (Halka Ay Deris Ahaan Dhacaan Iyo Baaxada)

**Casharka 1aad (3: Xiisadood)**

**Bilaabida wax-qabadka**

Weydii qaar ka mid ah su'aalaha sida kuwan soo socda si aad u bilowdid casharka

1. Qaybtee baad dunida kaga nooshihiin?
2. Maxay Aduunyadu u eg tahay?
   - Ma meel yar baa halka aad wakhtigaaga lntiisa badan ku qaadatid?
   - Ma meelaha ay dhacaan baa kuwan aad booqatay, akhriday ama aad ka aragtay Telefishanka?
   - Ma dhulka gebi ahaantiis baa?
3. Haddii aad qorshaysatay inaad ka tagtid Afrika oo aad tegtid yurub xagaaga dambe maxaad rabtaa inaad ogaatid bardhamaadka safarkaaga?
4. Qaaradee baad is leedahay waxay dhacdaa oo ay u dhawdahay cidhifka koonfureed?
5. Waa tee badwaynta laga helo ee u dhow cidhifka waqooyi?
6. Miyey kula tahay in halka ay dhacaan deris ahaan ay saamayn ku yeelato xidhiidhka waddamada iyo qaaradaha
7. Magacaw haraha iyo webiyada laga helo Afrika iyo Meesha laga helo?
8. Qaaradee ugu wada wayn, tee baase ugu yar baaxada?
9. Sidee bay khariidadu inooga caawin kartaa qaaradaha iyo badwaynada
10. wax Fikrad ah ma ka haysaa

Sida halka ay dhacdo meeli ay saamayn ugu yeelanayso dadka waxqabadkiisa?

## Ereyada Furaha u ah casharka

- Qaarad
- Bad, webi, har, badwayn
- Halka ay deris ahaan dhacdo
- Halka ay xariiqo (dhigo iyo loolal) ahaan dhacdo.
- Astaamaha duleed ee meel (goob)

- Astaamaha aadami ee meel (goob)
- Muuqaalada ugu w/wayn berriga ee qaaradaha kala duwan.

## Qoraal Rasmi ah (Nidaam wax-qabad)

Juqraafi-yaqaanadu waxay shiishka saaraan wax kasta iyo shay kasta laakiin la xiriirta baaritaannadooda min meel ilaa hawada sare ku xiriirinta nidaamyada kale waa aasaaska soo jeedinta shay kasta ee sababta meesha. Juqraafi-yaqaanada baranaya goob sida caadiga ah waxay kabilaabaan raadinta halka ay dhacaan meesha ay goobi dhacdo (ku taallo) waxaa lagu tibaaxi karaa deris ahaan ama xariiqo (dhigo&loolal) ahaan midkood.

**Halka ay xariiqo ahaan dhacdo:** Meeli waa xagee? Hal wado si looga jawaabo suaashan waa sharxida halka ay xariiqo ahaantooda dhacaan si loo helo halka ay dhacaan xariiqaha lagu calaamadiyo goobaha dhulka oogadiisa sare lagu calaamadiyo boosaska dhulka oogadiisa sare. xariiqaha loolasha , dhulbadhuhu wuxuu dunida u kala qaybiyaa laba qaybood. Ama Nus-dhul (Two Hemishpers) dhamaan berriga iyo biyaha ayuu u dhexeeyaa dhul badhuhu cidhifka waqooyina waa nus-dhulka waqooyi. Sidoo kale meel kasta oo dhacda inta u dhaxaysa dhul badhaha iyo cidhifka koonfureedna waa nus-dhulka koonfureedna. Xariiq-beenaadyada barbarada la ah dhulbadhaha waxaa loo yaqaanaa lool ama barbaro. Xariiq-beenaadyada kale ee nidaamsan waa dhigaha ama maldacyada kuwaas oo u xariiqan inta u dhaxaysa labada cidhif.

Halka ay deris ahaan dhacdo halka ay dhacaan waa halka meel laga helo oo ay la xiriiraan meelo kale. Meel kasta oo leh halka ay xariiqo ahaan dhacdo oo keliya waligeed fursad una hesho halka ay dhacdo. Waxaa ka duwan meel kasta oo leh halka ay dhacdo deris ahaan oo badan kuwaas oo isku bedeli kara wakhti badan.

Waa maxay qaaraduhu? Magaca qaarad waxaa laga soo dhiraandhiriyay erey laatiini ah “koontiinar” oo macnihiisa yahay “Beri Xidhiidhsan” in ka badan 70% oo ka mid ah oogada sare ee dhulka waxaa daboola biyo. Waana sababta dhulka loogu yeedho badanaa “Meere biyood” ku dhawaad saddex meelood hal meel oo ka mid ah dhulka inay tahay meelaha beriga ah. Meelahan beriga ah ee waawayn waxaa loo kala qaybiyaa qaarado.

Qaaraduhu waxay leeyihiin kala duwanaanshaha:-

- Juqraafiyeed
- Dhaqaale
- Luuqadeed
- Dhaqameed

Waxaa jira Todobo qaaradood waxaana loogu habayn karaa darajadooda baaxada ama bedkooda xataa sidoo kale tirada dadka Todobada qaaradood waxa ka mid ah: Aasiya (ta ugu wayn) Afrika (ta labaad ee ugu wayn), Waqooyiga Ameerika (3[aad]), koonfurta Ameerika (4[aad]). Anta-aartika (5[aad]), Yurub (6[aad]), iyo Awstraaliya owsheeniya (ta ugu yar).

**Meelaha (Goobaha):** meelkasta oo ka mid ah dhulka dushiisa waxay leedahay muuqaalo ay kaga duwan tahay meelaha kale waana midka u ogolaanaya in uu juqraafigu noqdo mid uu isbedbedelo xaga fahanka sida goobuhu isugu eg yihiin iyo ka duwanaanta midba midka kale.

Meeluhu (Goobuhu) waxay leeyihiin dabeecado (astaamo) duleed oo u gaar ah, oo ay ku jiraan qaababka berrigu, baadka iyo cimilada. Dabeecadahan duleed waxay ku kala duwanaan karaan dunida oo dhan. Berigu wuxuu noqon karaa buuralay meelo siman ama meel kasta oo u dhaxaysa. Meelahaas waxaa lagu sharxi karaa kelmad ahaan dabeecadahooda aadami. Imisa qofbaa ku nool, ka shaqeeya booqdayna meel? Waa maxay luqadahoodu, caadooyinkoodu iyo aaminsanaantoodu? Sidee bay dhaqaalahooda uga shaqeeyaan? Sidee bay isu maamulaan? Jawaabaha suaalahan, juqraafi yaqaanada barta dhamaan muuqaalada waxqabadka aadmi, sida koritaanka oobida, Xirfadaha beero falasho, siyaasadaha i.w.m. Goob kasta oo ka mid ah dhulka oogadiisa sare waxay leedahay dabeecado duleed iyo aadmi oo marka la isku daro u gaar ah.

Cinwaankani waxaad ku dabooli doontaan dabeecadaha ama muuqaalada ugu waawayn ee duleed iyo aadmi ee qaaradaha: muuqaalada berriga, halka ay derisahaan dhacaan. Qaaraduhu, baahsanaanta haraha, webiyada ugu waawayn (dhererka, isha, meelaha dhamaadka) godanta (Jooga ugu hooseeya) Lamadegaanada, baadka ku hagoogan (kaymaha, dhul cawseedyada).

Dhamaan qaaraduhu waxay leeyihiin qaabab berri oo kala duwan muuqaalada berriga oo ina siiya meel kasta oo leh ka duwanaan dabeecado (astaamo) iyo qaab. Waxay sida caadiga ah u kala saaraan ayadoo loo eegayo joogga-kala duwanaanshaha. Kacsanaanta inta u dhaxaysa meelaha ugu sareeya iyo meelaha ugu hooseeya. Barta ugu saraysa duinda waa buurta Everest (8848 metir ka saraysa heerka badda) iyo meesha ugu hoosaysa oo ah badda meydka (dhimatay) 392 mitir ka hooseysa heerka badda) Dalkeenan Itoobiya meesha ugu jooga hoosaysa waxaa laga helaa Dawlada Deegaanka Canfarta. Waxaa loogu yeedhaa godanta Danaakila. Waxaa lidkeeda ah fiiqa ugu sareeya oo ah buurta Raas dhashan (4620 mitir heerka badda ka saraysa) Noocyada ugu muhiimsan ee qaababka berriga waa buuralayda, taagaga, dulaha sare ee siman iyo bannaanada.

Sidaa darteed waa muhiim in loo sharxo lagana caawiyo ardayda barashada muuqaalada ugu muhiimsan kuna kala duwan ylhiin qaarad kasta.

**Tusaale:** Aanta aartika suuro gal ma aha nolosha (Xayawaanka duurjoogta malaha kaluun, iyo nooc baad oo muhiim ah).

**Oogooyinka (Dulaha) Biyaha:** Qiyaastii saddex meelood laba meelood oo ka mid ah dhulku waa biyo. Biyaha intiisa badan waa badwayno. Badwaynadu waa meelaha ugu wayn ee biyaha dhulka dushiisa. Waxaa jira Afar badwayno oo **kala ah:** Baasifiga (oo ah ta ugu wayn) Atlaantika, Hindiya iyo badwaynta Aartika (ta ugu yar) waxaa kale oo jira noocyo kale oo dulaha biyaha leh ka mid ah sida baddaha yaryar, haraha iyo webiyada.

Halkan waa mid muhiim ah in ardayda si cad loogu qeexo iyo kala duwanaanshaha ka dhexeeya noocyada kala duwan ee dulaha biyaha (sida badwayn, haro, bado yaryar, webiyo) iyo muuqaalada beriga (Buuro, Taagag, Dulaha sare ee siman iyo Bannaano).

U tilmaan ardayda, khariidada dusheeda, ta badwaynta ah, ta baddaha yaryar ah iyo harahaba adiga oo u kala saaraya qaaradaha.

## Soo jeedinta habka dhigista

- **Daraasad tusaale:** nolosha laba meelood oo is diidan (iska soo horjeeda dunideena), Buurta Eerest (fiiqa ugu sareeya) iyo Badda dhimatay (Meesha ugu hoosaysa) Lamadegaanada/qaybta ugu qabow ee duinida i.w.m.
- Isla falanqayn
- Suaalo iyo jawaabo
- Faah faahin

## Soo jeedinta kaabayaasha dhigista

- Khariidada Dunida
- Khariirada Marinada shirkada diyaaradaha Itoobiya
- koonka (Galoobka)
- Atlaska.
- Khariirada cimilo-gooreedka/Cimilada Aduunka
- Khariirada jooga kala saraynta ee dinida

## Cashar-diyaarinta ka hor

- Isku day inaad heshid khariirada dunida
- Isku day inaad heshid sawirka kaas oo ku tusaya adeegsiga khariidadaha ee ay dalxiisayaashu u adeegsadaan si ay u helaan wadadooda Addis Ababa
- Sii akhris shaqo guri ah ardayda oo ku saabsan dhamaan muuqaalada ugu waawayn berriga ee qaaradaha
- Sii ama u dir shaqo guri mid ama laba arday inay soo sawiraan khariirada dunida loox ama tabeele dushii.
- Ku dhiiri geli ardayda inay bartaan khariidada dunida.
- U habee ardayda todoba kooxood. Kuna calaamadee koox kasta hal qaarad weydiina inay soo akhriyaan soona jeediyaan muuqaalada ugu muhiimsan berlga siday u kala horeeyaan qaaraduhu.
- Cimilo-gooreedka iyo Cimilada

- U diyaari laba daraasadood oo ah sida ay dadyawgu ugu nool, yihiin laba muuqaal oo berri oo kala duwan (lama degaan/qaybta dunida ee ugu qabow, meelaha baanaanada ah/keymaha)

## Qiimaynta

- Tus ardayda sawir tusaya khariidadaha ay adeegsadaan dalxiisayaasha si ay ugu helaan marinnada (wadada) ku xeeran Addis Ababa weydiina hadii halka ay dhacdo deris ahaan ama xariiqo dhig iyo lool ahaan si ay u helaan marinada ku wareegsan Addis Ababa?
- Sharax dabeecadaha ama astaamaha duleed iyo aadami ee meesha aad ku nooshahay?
- Weydii ardayda inay kala soocaan badaha yaryar /badwaynada iyaga oo u kala saaraya qaaradaha?
- Weydii ardayda sida ay dulaha sare ee siman uga duwan yihiin bannaanada?
- Weydii ardayda inay taxaan (qoraan) haraha iyo webiyada ugu waawayn iyo meesha laga helo?
- U habee ardayda kooxo yaryar weydiina in ay falanqeeyaan sida uu halka ay deris ahaan dhacaan u saameeyo xidhiidhka ka dhexeeya qaaradaha siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaanba?
- Weydii kooxo isku mid ah oo kamid ah ardayda in ay taxaan ama qoraan fiigyada ugu sareeya iyo joogaga ugu hooseeya ee qaaradaha kala duwan?
- Qeex kelmada “Yuurayshiya”?
- Waa qaaradee qaarada leh jooga ugu sareeya iyo ka ugu hooseeya labadaba?
- Tax ama qor dhamaan qaaradaha?

## Tixraacyo


- Arthur gates, judi gates iyo Jerome sellmall, Hordhac juqraafiga, mcgrllhill, B, london, daabacaadii 6 aad 1995
- B’adhow, Michael, iyo Ruth weber, aasaaska juqraafiga muuqaaleed, madba cada C. brown, Iowa, 1995

- Eupzer. K.W. juqraafiga ka yimid dhulka, madbacada Harper iyo row newyork, 1976
- Akin Wallace E, Hanaanka (Naqshadaha) Aduunyo: cimilada, Baadka, carrada, jaamacad Oklahoma, 1991
- Barry G. Buur, cimilo gooreed iyo cimilo, Newyork, nepubl, 1981
- Barry G, iyo R. J, chorley gibilka iyo cimilada, daabacaada 5[aad], Newyork.


## 1.2 Dadyawga Dunida

**Casharka Labaad (xiisadaha: 6)**

**Afkaarta ugu muhiimsan:**

**Bilaabida wax-qabadka**

Waydii suaalaha qaarkood sida kuwan soo socda si aad u bilowdid casharka

- Imisa luuqadooda ayaad ku hadashaa?
- Magacaw luuqadaha ay ku shaqeeyaan Qaramada Midoobay iyo Midowga afrika?
- U habee ardayda kooxo yaryar weydiina inay kala saaraan luuqadaha sida qaalibka ah looga adeegsado waddamada kala duwan ee qaaradaha.
- Waa luuqadee luuqada ay dadka ugu badanni ku hadlaan ee dunida?
- Waa luuqadee luuqada ugu caansan ee loogu isticmaalka badan yahay dunida?
- Weydii ardayda in ay u falanqeeyaan koox ahaan sida luuqadaha qaarkood sida Ingiriisiga oo kale ugu faafay sida balaadhan dacalada dunida iyo Isbaanishka caanka ku ah ama waddamada laatiin Ameerika?
- Ku dhiiri geli ardayda in ay khariirada korkeeda ka tilmaamaan halkii ay ilbaxnimadii ugu horaysay ka bilaabantay?
- Maxay ahaayeen qaar kamid ah guulihii ilbaxnimadii qadiimka ahayd ee qaybo kala duwan oo dunida ah?
- Waa maxay sababta ay kula tahay kooxihii dadyawgii qadiimaka ahaa ay u doorteen inay ka ag horumariyaan ilbaxnimada biyaha?

## Ereyada Furaha uah casharka

- Luuqada rasmi ah
- Luuqad caalami ah
- Gumaysi
- Ilbaxnimo
- Dimoqraadiyada xoriyadnimada
- Laba luuqadoolle
- Imbiraadooriyad
- Jamhuuriyad

## Nidaam wax-qabad (qoraal Rasmi ah)

Juqraafiga Aadmiga waxaa ku jira ciwaaano silsilad ah oo balaadhan sida: barashada luuqadaha, diimaha, caadooyinka dhaqaalaha iyo nidaamyada siyaasadeed.

Koox kasta oo dad ahi waxay horumariyaan isku habaynta caadooyinka, aaminsanaanta iyo ficiladooda kaas oo ay ku sameeyaan dhaqankoodu. Dhaqanku waa aaminsanaan iyo ficilo kaas oo lagu qeexo koox dadyaw ah hab nololeedkooda. Dhaqanku waa mid laga dheehan karo walxaha iyo afkaarta labadaba-waana habab Agab(Alaab) ahaaneed iyo kuwo aan agab (alaab) ahayn. Agab dhaqameedka waxaa ka mid ah waxyaalaha ay dadku samaystaan sida cunnada, dharka, waxyaalaha dhagaxa laga qoray, farshaxanka, xirfadaha, iyo Tignoolojiga.

Kuwa aan agab-dhaqameedka ahayn waxaa ka mid ah diinta, luuqada aaminsanaanta ruuxda, iyo Noocyada dabeecadaha.

**Urur bulsho:** dhaqan kasta wuxuu abuuraa qaab dhismeedka bulsho ee u habaysan xubnahooda u sii kala baxa qaybaha yar yar. Urur bulsheedkani waxaa looga jeedaa inay dadku iska caawiyaan xaga shaqada si wadajir ah dhaqan ahaan una kulmiyaan baahiyahooda aasaasiga ah.

Dhamaan dhaqamadu, qoysku waa midka ugu ahmiyada wayn ee unuga urur bulsheedka, inkastoo qaab-dhismeedka qoysku kala duwan yahay dhaqamada faraha badan.

**Muuqaalada Dhiraynta:** Tignoolajigu waa qayb ka mid ah dhaqanka oo muhiim ah markii uu bini aadanku isticmaalayo khayraadka dabiiciga ah ama wax ka bedelayo dhulka oogadiisa sare, waxay soo saaraan.

Muuqaalo dhireed dhaqameedyo quruxsan oo isku mid ah taas oo laga dheehan karo dhaqamo khaas ah.

**Isbedel dhaqameed:** dhaqamadu waa kuwo isku bedela saamaynada gudaha iyo kuwo dibadeed labadaba. Dhaqan gudihii, waxaa isbedel ku keeni kara daahfurada iyo wax cusub soo saariduba. Isdbedelka ka yimaada dibada ee ku dhaxmara fidis (baahis) ama sifooyinka faafitaanka dhaqameed ee haldhaqan ilaa kuwo kale habka ama nidaamka la qabsi ee sifooyinka dhaqamada kale ayaa loo yaqaana.

Fididu ama baahistu waxay ka dhex dhacdaa safarka iyo qixitaanka (doolaalka).

**Luuqadaha:** luuqadu waa nidaamka codadka dhawaaqyada iyo calaamadahooda la qoray kuwaas oo ay dadku u adeegsadaan isgaarsiinta midba midka kale.

Ku dhawaad 3000 luuqadood ayaa maanta lagu hadlaa. Waxaana lagu saleeyaa isu ekaanshahooda iyo asalkooda, luuqadaha waxaa loo kooxayn karaa xoogaa kala saarid ah waxaana ugu muhiimsanna bah-luuqeedka (ka tus bah-luuqeedyada khariidada dusheeda).

Luuqadu waa laf-dhabarka dhaqanka. Luuqad la‘aan dadku mayna awoodi kareen in ay is la xiriiraan. Uma ayna gudbin kareen waxa ay yaqaanaan ama ay aaminsan yihiin jiilka cusub. Luuqada waxaa laga dheehan kartaa aqoonsiga dhaqanka. Dadyawga ku hadla luuqad isku mid ah guud ahaan waxay wadaagaan cadooyin siku mid ah. Bulshooyin badan si kastaba, ha noqotee, oo ay ka mid yihiin kooxaha dadyawga ugu balaadhan ee ku hadla luuqadaha kala duwan sida Hindiya. Tusaale ahaan in ka badan 700 luuqadood ayaa lagaga hadlaa. Wadamo dhawra oo Afrikaan ah Sida Nayjeeriya iyo Itoobiya.

Waxay leeyihiin dadyaw badan oo ku hadla luuqado kala dhwan luuqadaha dunida ugu waawayn waa: Ingiriisiga Carabiga, Isbaanishka, Faranshiiska, Sawaaxiliga.

- Luuqadaha ugu waawayn ee loogaga hadlo qaybo badan oo dunida ah Isbaanish dalka Isbeyn iyo laatiin Ameerika marka laga reebo Baraasiil, Carabiga bariga dhexe, Faransiiska dalka Faransiiska iyo waddamada badan ee galbeedka Afrika Ingiriisiga dalka Ingiriiska, Waqooyiga Ameerika Awstreeliya, Yurub; Afrika badankeed, Aasiya badankeed.

- Gumaysigii iyo dhawaanahan dambe oo in ka badan edegayntu ama caalmiyeyntu ay door muhiim ah ka cayaartay fiditaanka iyo qaab bedelida luuqadaha iyo dhaqanka.
- Geeska afrika Dooxada dheer ee webiga Niil (Itoobiya, Suudaan Masar) Bariga dhexe (dooxada dheer ee webiga Furaat) Hindia iyo Shiinaha (Tusaale dooxooyinka webiyada Induu iyo jaynjis) beershiyadii hore, giriigii, roomaankii, inkas i.w.m. waxay sameeyeen (ka bilaabantay) ilbaxnimooyinkii qadiimka ahaa.
- Waa muhiim in ardayda laga caawiyo fahamka qaar ka mid ah guulihii ilbaxnimooyinkii hore.
- Masaaridu waxay ka dhiseen mid ka mid ah ilbaxnimadii ugu horaysay daamaha wabiga Niil.
- Ilbaxnimadii ugu horaysay ee shiinuhu waxay ku ag horumartay wabiga wayn ee la yiraahdo Huruuda iyo webiga Yaangtze
- Dalkeenan Itoobiya asalkii binu aadamka ayaa laga helay luusi iyo Ardi oo laga helay gobolka Canfarta Waqooyiga bari ee Itoobiya

## Soo jeedinta hababka dhigista

- Isla falanqayn
- Koox hawleed iyo soo bandhigid
- Daraasad
- Koox-hawleed
- Faahfaahinta oo qoraal iyo muuqaal ah
- Qoraalka laba bog ay ku soo qoraan koox ahaan oo ku saabsan ilbaxnimadii hore iyo waxyaabihii casriga ahaa ee ay ku soo kordhiyeen dunida

## Soo Jeedinta Agabka Dhigista

- Khariidada luuqadaha dunida
- Wadiiqadii ganacsi ee hore ee dunida
- Khariidada Aduunka

## Cashir-Diyaarinta Ka Hor

- U dir shaqo guri si ay ardaydu shiishka u saaraan luqadaha ugu Waawayn iyo xadaaradihii qadiimiga ahaa ee dunida
- Isku day inaad heshid khariirada luuqadaha ee dunida
- U habee ardayda kooxo yaryar waydiina inay soo bandhigaan abuuritaanka iyo qaar ka mid ah guulihii ugu waawaynaa ee xadaaradihii qadiimiga ahaa (Shiinihii Hindidii, Faarisiintii, Masaaradii hore i.w.m)
- U dir shaqo guri iyagoo kooxo yar yar ah oo arday ah si ay u soo akhriyaan una dheehdaan hal ama laba daraasadood oo ilbaxnimooyinkii hore ah sida: Itoobiya, Masar, Shiinaha, Giriigii
- U diyaari sheekooyin shaqsiyaadka mawqifkoodu ahaa dhaqamada badan. Weydiina ardayda inay lafaguraan isbedeladii iyo fursadihii sheekada.
- U habee ardayda marti caalami ah ama dadyaw leh waayo aragnimo si ay ugu sheekeeyaan waayo aragnimadoodii xaga dhaqanka iyo taariikhdii waddamada qalaad.

## Qiimaynta

- Waydii ardaydu inay kala saari karaan luuqadaha ugu waaawayn
- Weydii ardayda sida qaabka luuqadaha dhaqanka bulsho lagu siiyay
- Waydii ardayda in ay calaamadeeyaan khariirada dusheeda meesha loogaga hadlo luuqadaha ugu waaawayn
- Waydii ardayda inay magacaabaan meelaha ay xadaaraduhu ka bilaabmeen
- U habee ardayda kooxo yaryar khudbad ku saabsan waxyaabihii ugu waawaynaa ee ay ku soo kordhiyeen Masaaridii, Itoobiya, Hindidii Shiinihii, Faarisiintii iyo Giriigii hore
- Waydii inay sababeeyaan sababta uu Ingiriisigu ugu fiday sida balaadhan.
- U habee koox ardayda oo soo bandhigta wuxuu ahaa konfiyuushiyas iyo ku soo kordhintiisii ilbaxnimadi Shiinaha

- U habee kooxo arday ah oo khudbad samaysa ku saabsan soo if bixii iyo dhicitaankii Imbiraadooriyadii Roomaanka

# 1.3 Baahsanaanta Tirada Dadka & Hab-Nololeedka

**Casharka 3aad (Xiisadaha: 8)**

**Bilaabida wax-qabadka**

***Weydii qaar ka mida su'aalahan soo socda marka aad bilaabaysid casharka.***

- *Deriskiinu ma meel dad ka buuxaan? Fasaladiinuse?*
- *Miyey idin la tahay tirada dadku inaanay sinayn baahsanaant oogada sare ee dhulka?*
- *U kala qaybi fasalka koox yaryar una dir koox kasta inay falanqeeyaan arimaha kala duwan (muuqaaleed, bulsho, dhaqaale, siyaasadeed i.w.m) ee saamaynta ku leh baahsanaanta tirada dadka.*
- *Meelahee bay idinla tahay inay dadku isku cufan yihiin? Waayo?*
- *Meelahee bay idinla tahay inay dadku teel-teel yihiin? Waayo?*
- *Waddamadee baa, lagu saleeyaa tirada dadkooda iyo baaxadahooda muuqaaleed, miyey idinla tahay inay noqonayaan kuwa ay dadku si wayn isugu xoonsan yihiin*

## Furaha Ereyada (Kelmadaha)

- Baahsanaanta Dadka
- Arimaha dhinacyada taban (xun) iyo togan (fiican)
- Cufnaanta dadka
- Hab-nololeed
- Teel-teelnimada dadka
- Diin
- Cufnaanshaha dadka
- Kiristaanka, Islaam, Budhiisamka
- Luuqada

- Arimaha muuqaaleed/deegaan ahaaneed
- Arimaha aadami/bulsho ahaaneed

## Hababka wax-qabadka

Tirada dadku si aan is leekayn ayay ugu baahsan yihiin dhulka oogadiisa sare iyo xataa qaaradaha iyo waddamada gudahooda.Tirada dadku waxay u koraysay intii lagu jiray qarnigii labaatanaad si ka dhaqso badan wakhti kasta habka ugu fudud ee lagu xisaabiyo cufnaanta tirada dadka waa in loo qaybiyo wadarta tirada dadka ee gobol bedka dhulka ee gobolkaas.

Baahsanaanta tirada dadka waxaa lagu cabbiri karaa saddex hab:

- ✓ Cufka xisaab-fal ahaaneed: waa inta qof ee kiiloo mitir laba jibaaran ee meel juqraafi ahaaneed. Taas oo ay macnaheedu tahay wadarta tirada dad ee waddan oo loo qaybshay wadarta dhulka oo kiiloomitir laba jibaaran ee waddankaas.
- ✓ Cufka miyi ama beealay ahaaneed: (tirada dadka oo loo qaybshay dhul beereedyada): waa xidhiidhka ka dhexeeya tirada dadka ee miyiga iyo dhulbeereedyada. Waa cabbirka ugu fiican ee tirada dadka iyo xidhiidhada khayraad ee waddamada beeralayda leh sida dalkeena Itoobiya.
- ✓ Cufka dhaqaale ahaaneed : waa saamiga u dhexeeya baahida dadka iyo tirada khayraad ee ay soo saarayaan (C.Dh = T halkaas oo C. Dh = cufka dhaqaale, T = tirada dadka, = tirada baahida ee qofkiiba, = waa bedka oo kiiloo mitir laba jibaaran iyo = tirada kheyraadyada laga soo saaro kiiloo mitir laba jibaarkiiba

## 1.3.1. Meelaha ay dadku ku yar yihiin

I. Tundraha: waa meelaha jooga hoose leh ee xuduudaha B/wayta Aartika ee w/Ameerika (Tusaale, Alaska) iyo Yurayshiya (Eurasia). Iyada oo ay ugu wacan tahay mudada koritaanka oo aad u gaaban meelahaas oo ay la qabsadeen dad aad u yari

II. Dhulka qalalan ee kulul: waxay ka kooban yihiin in badan oo lamadegaanka kulaalayaasha ah. Meelahaan oo leh degitaano dad oo

joogto ah biyo yaraata iyo heerkulka sare ayaan u saamaxayn degenaan joogto ah.

III. Dhulalka kulul ee qoyan: kuwaan waxaa ka mid ah saxanka Amasoon saxanka koongo iyo jasiirada aha Indooniishiya, kuwaan waxaa lagu sifeeyaa qoyaan sare, roobda iyo heerkul sare. Sababta oo ah cimilado aan fiicnayn, tirada dadka oo ah. Mid teel-teel ah (ku yar yihiin)

IV. Joogaa sare meelaha buuralayda ah ee leh kala saraynta sare, oogada aan sinayn iyo heerkulka aadka u qabow oo aan dhiiri gelinayn degitaanka Tusaale: buuralayda Himalaya, Kilimanjaro, Raas dhashan i.w.m.

- **Meelaha ay dadku sida aadka ah u cufan yihiin ee dunida**

  Suunka tirada dad ee Aasiya, gacanka (dhulka wayn ee jasiirada u eg) ee Yurub iyo Waqooyiga Bari ee Ameerika oo ah saddexda suun ee ugu waawayn ee cufnaanta dadku ugu sarayso uguna xoonsan yihiin. Saddexdaan suun waxaa lagu xisaabiyaa inay in ka badan saddex meelood laba meel ka yihiin tirada dadka ee Aduunka.

- Saxamada wabiyada ee Mansuunta Aasiya oo ku jiraan:
  - Bariga Aasiya-Jabaanka iyo Shinaha
  - Koonfurta Aasiya Baangladhesh-Hindiya, Baakistaan

Gobolkan waxaa lagu xisaabiyaa in ka badan kala badhow badh wadarta tirada dadka ee dunida. Dadyowga intooda badani waxay ku mashquulsan yihiin falashada ama beerashada bariiska.

- Yurub: Qaaradan waxaa ka taageera baaxada badan ee tirada dadka. Waxay leeyihiin cimilo ku haboon iyo kheyraadyada dabiiciga ah.
- Waqooyiga Bari ee Ameerika qaybtan Ameerika (maraykanka) oo ah meel ay ka jirto magaalooobid sre iyo warshadayni. Koritaanka magaalooyinka, warshadaha iyo dhaqaalaha macdan qodista waa sababta ugu wayn ee joogitaanka baaxada aadka u balaadhan ee tirada dadka sababaha dhaliya kala duwaaamshaha baahsanaanta dadka.

- Arimaha dhinaca togan (fiican) waa arimaha abuura xaaladaha aadka ugu fiican tiro badnaanta dadka. Qaar ka mid ah arimahaas waxaa ka mid ah:-
- Cimilada fiican
- Carrada san
- Biyaha ku filan
- Horumarka

Arimaha dhinaca taban (xun) arimahani waa kuwa aan dhiiri gelinayn badnaanshaha tirada dadka. Arimahaan qaarkood waxaa ka mid ah:

- Cimilada aan fiicnayn sida qabowga kulaylka xad-dhaafka ah, qalaylka xad-dhaafka ah ama cimilada aadka u daran.
- Dhulka buuralayda ah ee leh carro santa aadka u liidata.
- Meelaha aan soo dhawaynta lahayn halkaas oo ganacsigu dhib badan yahay
- Meelaha qaarkood dadku si culays leh ayay u joogaan qaarkoodna si cufnaan leh
- Arimaha duleed iyo bulsheed waa kuwa saameeya baahsanaanta tirada dadka ee oogada sare ee dhulka
- Arimaha duleed (muuqaaleed) waxa ka mid ah: cimilada , joogga, kaymaha/baadka ku shareeran, cudurada,
- Arimaha Aadami: waxaa ka mid ah: siyaasadaha, koritaanka dadka (Dhalashada, dhimashada, Qixitaanka) Gaadiidka, Dhaqaalaha iyo Tignoolajiyadda.

## Soo jeedinta Habka dhigista

- Koox-u-falanqayn
- U habee ardayda kooxo yar yar kadibna u ogolow inay ka doodaan faaiidada iyo khasaaraha waddamada leh koriinka dadwayne ee sare iyo hoose
- Ku soo bandhigid muuqaal iyo qoraal
- Soo jeedin
- Sharaxaad

## Soo jeedinta kaabayaasha Dhigista

- Khariidada dunida ee baahsanaanta tirada dadka
- Tiro koobka tirada dadka (shaxda)

## Cashir diyaarinta ka hor

- La hadal khabiir laga helo goobtaas kuna marti qaad in uu (inay ardayda u soo jeediyo) so aqoonta uu leeyahay tirada dadka.
- Isku day inaad heshid xogta tiro koob ee tirada dadka aduunka
- Ardaydaadu ah qoreen tuducyo ku saabsan sababta tirada dadku isu le'ekaan wayday baahsanaantooda oogada sare ee dhulku.

## Qiimaynta

- Waydii ardayda inay tilmaan ka bixiyaan gobolada dunida ee ay dadku isku cufan yihiin iyo meelaha ay teel-teelka yihiin ee khariidada dusheeda.
- Waydii sababta gobolada/waddamada qaarkood u leeyihiin baaxada dad ee saraysa iyo baaxada dad ee hoosaya.
- Waydii ardayda inay sharax yar oo gaaban ka bixiyaan arimaha ugu waawayn ee dhaliya kala duwanaanshaha baahsanaanta. Tirada dadka ee dhulka oogadiisa sare
- Waydii ardaydu inay sharaxaan sababta aanay dadka baahsanaantiisu isu'le'e kayn kayn Itoobiya gudaheda.

**Hab-nololeedka qaybaha kala duwan ee dunida**

**Bilaabida wax-qabadka**

- Miyey idinla tahay inay deriskiinu nolosha ku kasbadaan dhaqdhaqaaqyo/degenaansho isku mid ah?
- Kelmadahan soo socda ku qora loox afar gees (boodh): beeraha, warshad waxsoosaar, Gaadiid mid kasta oo ka mid ahna ha qeexaan, weydiina ardaydu inay sharaxaan marka ay islafalanqaynayaan gobolada (degmooyinka) waddamada ee dunida ee ku tiirsan wax qabad dhaqaleedkaas?

- Weydii inay si qoto dheer u falanqeeyaan sababtay qaaraadaha kala duwan ugu tiirsan yihiin wax-qabadyo dhaqaale oo kala duwan?
- Maxaa looga jeedaa sababta uu dal si wayn ugu tiirsan yahay beeraha ama warshadaha?
- Ku dhiiri geli inay isla falanqeeyaan haday dadyawga gobolada kala duwan uu midba midka kale ku tiirsan yahay dhaqaale ahaan iyo siyaasad ahaan.

## Hababka waxqabadka

Nidaam kasta oo dhaqaale waxaa qasab (waajib) ah in uu ka jawaabo (3) saddexda su’aalood ee gundhiga ama aasaaska ah waa maxay (iyo waa imisa) badeecadaha adeegyada la soo saari doono? Sidee baa wax soo saaradan loo soo saaray? Sideebay waxsoo saarka iyo hantida laga helaa u baahsanaan doontaa?

Farqiga wayn ee u dhaxeeya nidaamyada dhaqaale waa habka xaaladaas ka qayb qaata ee waxsoosaarka iyo baahsanaanta badeecadaha iyo adeegyada. Si ay ugu guulaystaan koriinka dhaqaale iyo horumar, waddamada kala duwan waxay u adeegsadaan habraacyo kala duwan. Taas oo looga jeedo, nidaamyada dhaqaale ee lagaga dhaqmo dunida.

1. **Hantigoosi:** waxaa sidoo kale loo yaqana dhaqaalaha suuqa. Nidaamka hantigoosiga, dadka, sidoo kale quutayaasha (macaamiisha) waxaa ka caawiya go’aaminta waxa la soo saari doono iibinta iyo iibsasho la’ aanta waxsoosaarka, nidaamka ka hooseeya hantigoosiga saafiga ah ee dawlad kama qayb qaato dhaqaalaha
2. **Shuuciyad:** waa mid ka duwan hantigoosiga, kaas oo ayna dawladi ka qayb qaadanin. Shuuciyadu waa mid u baahan maamul u sameeya dhamaan go’aamada dhaqaale. Maxaa yeelay qorshaynta dhaqaale oo ah mid ay dawlada dhexe gacanta ku hayso. Nidaamyada shuucigu waa kuwo sidoo kale loo yaqaano “dhaqaalayaw la qorsheeyay”
3. **Hantiwadaag:** waxaa sidoo kale loo yaqaanaa xukun dhaqaale. Falsafada aasaasiga ah ee hantiwadaagu waa mid ku taxaluqda in badeecada bulshada oo dhan ay dawladu iska leedahay iyo warshadaha aasaasiga ah ee sida gaadiidka, isgaarsiinta, bangiyada qodista dhuxul dhagaxda, iyo warshadaha birta soo saara. Maxaa yeelay shirkadaha

ganacsi ee gaarka loo leeyahay oo in badan ka shaqeeya qaybaha kale ee dhaqaale, in badan oo aaminsan nidaamka hantiwadaaga waxay sidoo kale ku sharxi karaan "dhaqaalayaw isku jir ah" kaasoo ah mid isku xidhaya suuqa go'aamo dhaqaale oo waxtar u leh wadan isku darka dhaqaalayawga ee dawlada iyo waaxaha gaarka loo leeyahay labadaba waxay door muhiim ah ka cayaaraan kaalinta ka jawaabida maxay? Sid ee? iyo kuma?  ee su'aalaha khuseeya bulshada dhamaanteed

4. **Nidaamka dhaqaale dhaqameed:** waa mid ay si aad ah ugu dhaqmaan ameelaha dib u dhacsan ama bulshooyinkii hore sida qadhaabsigii iyo ugaarsigii. Waxsoosaarka iyo isticmaalka labadaba waa kuwa aan dhaafsiisnayn dagaanada gaarka ah iyo ujeedo quutul maalmeed ahaaneed loo isticmaalo.

**Waxqabadyada dhaqaale:** waa hababka ay dadyawgaasi uga faaiidaysanayaan dhulka iyo khayraadyada si ay u kasbadaan noloshooda. Waa kuwo si aad ah u kala duwan gebi ahaanba dunida. Waxqabadyada dhaqaale ee kala duwan ee lagaga dhaqmo dunida waxaa loo kala kooxeeyaa (kala qaybiyaa) saddex oo kala ah:

I. Wax qabadyada dhaqaale ee heerka koowad: waxa ka qayb qaata wax soo saarka cunnada la cabeeyo iyo agaabada (alaabta) cayriin. Waxqabadyada ugu waawayn ee heerka koowaad waxaa ka mid ah: ugaadhsiga, qadhaabsiga, kuluumaysiga, dhiraynta, macdan qodista iyo beeraha.

II. Wax-qabadyada dhaqaale ee heerka Labaad:- waxa ka qayb qaata nidaaminta alaabta cayriin ee badeecadaha la dhamaystiray iyo kuwa dhamaadka ku dhow. Alaabta cayriin ee la nidaaminayo waxaa laga helaa beeraha, dhiraynta, kaluumaysiga iyo macdanta la qodo. Guud ahaan waxqabadyadaani waa kuwa sida balaadhan u qeexaya warshadaha wax soo saara iyo waxyaabaha fudud ee gacanta lagu sameeyo sida dheryaha, ashuumada i.w.m.

III. Wax-qabadyada dhaqaale ee heerka saddexaad: waxa ka qayb qaata ganacsiga, gaadiidka, dalxiiska iyo noocyada kala duwan ee adeegyada mar marka qaarkood oo shaqooyinka xafiiska sida teeb garaacaha (qoraal

ka warqadaha) karaaniga, maamulka fulinta ganacsiga i.w.m. waxaana loo sii kala saaraa waxqabadyada heerka afraad.

1. Baahsanaanta xooga shaqaale oo ku tiirsan (ku xidhan heerka horumar ee waddamada. Waddamada aadka u liita (saboolka) xooga shaqaale ee ugu badani waxay xooga saaraan waaxda ama qaybta heerka koowaad. Xooga shaqaale ee dhaqaalaha horumarinaya waxay xooga saaraan waaxaha heerka labaad iyo saddexaad.
   - Dadyawga qaybaha kala duwan ee dunidu waxay ku hawlan yihiin waxqabadyada dhaqaale ee kala duwan.
   - Si kasta ha ahaatee goboladaani waa kuwo isku tiirsan dhaqaale iyo siyaasad ahaanba.
   - Dhaqaalaha waddamada reer galbeedku wuxuu si wayn ugu tiirsan yahay waxsoo sarka warshadaha iyo waaxda adeega.
   - Halka saamiga wayn ee shaqaalaha Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika ay ilaa iyo haatan ay ku mashquulsan yihiin beeraha.
   - In badan oo ka mid ah waddamada soo koraya waa kuwo kordhinaya warshadahooda laakiin ilaa hada waxaa ka horaysa waddo dheer si ay u tagaan ka hor inta ayna la qabsan ama aanay gadaal ka soo gaadhin dhaqaalaha waddamada reer galbeedka
   - Waddamo kala duwan ayaa ah kuwo soo maray marxalado kala duwan horumarka dhaqaale. warshadaha waddamada leh waxaa loo tixgeliyaa inay yhiin kuwa horumaray, halka waddamada aan warshadaha lahayn loo tixgeliyo kuwa soo koraya

## Soo jeedinta habka dhigista

- Islafalanqayn
- Dood
- Ku soo bandhigida muuqaal iyo qoraal

- Soo jeedin
- Faah faahin

## Soo jeedinta kaabayaasha Dhigista

- Khariidada dhaqaalaha dunlda
- Tiro koobka wax qabadyada dhaqaalaha ee qaarad kasta.
- Warqad wayn ama khariidada ku tusaysa baahsanaanta dhaqaale ee saldhiga u ah hab-nololeedka.

## Cashar diyaarinta ka hor

- Isku dey inaad heshid tiro koobka nidaamka dhaqaale ee dunida
- Ardaydaadu ha soo qoreen tuduc ay isla falanqaynayaan sababta Afrika ay caan ugu tahay beeraha Yurubna warshadaha?
- U dir ardayda shaqo guri oo koox ah si ay u ogaadaan ama u soo saaraan sida ay dadyawga kala duwan ee qaaraduhu u kasbadaan hab nololeed kooda tusaale: in ay isku xiraan waxqabadyada dhaqaale iyo qaaradaha.

## Qiiimaynta

- Fasalka u sii shaqo si ay u aqoonsadaan waaxaha/wax qabadka dhaqaalaha ugu muhiimsan ee gobolada kala duwan ee hab nololeedkooda aasaasiga ahi ku xiran yahay.
- Falanqaynta waxa ay ardayda la tahay faaiidada iyo faaiido darrada waxyaabaha ka qayb qaata waxqabadka dhaqaale ee kala duwan.
- Waydii ardayda si ay u aqoonsadaan gobolka bulshadu ay beeraha tabcadaan, midka warshadaynta leh, midka ay warshadayntiisu xawliga tahay.
- U habee ardayda kooxo yar yar una ogolow inay isla falanqeeyaan sida waxqabadyada kala duwan ee dhaqaaluhu isugu tiirsan yahay iyo xidhiidhka ka dhexeeyaba.

## Diimaha ugu Waa wayn dunida

**Bilaabida wax qabadka**

- Waa maxay diinta aydin raacsan tihiin?
- Maxay kala yihiin diimaha ugu waawayn dalkeenan Itoobiya?
- Magacaw qaar ka mid ah diimaha dunida ugu w/wayn?

- Sidee bay idiinku timid in aad raacdaan diinta aad raacsan tihiin?
- Sidee bay diin ku faaftaa?

## Hababka wax- qabadka

- Diintu waa muuqaalka (aragtida) kale ee muhiimka ah ee dhaqanka. Diintu waxay dadka ka caawisaa ka jawaabista su’aalaha aasaasiga ah ee ku saabsan macnaha iyo ujeedada nolosha.Waxay ka taageertaa qiimaha in dadka koox ka mid ahi ay u tixgeliyaan muhiimada. Diimaha laga aaminsan yahay dunida oo dhan way kala duwan yihiin
- Halganka diimaha badan kala duwanaanshuhu waa dhibaato ka jirta waddamo badan
- Diimaha ugu waawayn dunida waxaa ka mid ah
- Kiristaanka (Oortodhogoska, Kaatooliga, Borotastanka)
- Islaamka (sunniga iyo shiicada)
- Hinduusamka
- Buudhiisamka
- Yuhuuda
- Caadooyin ahaan.

Tus ardayda khariidada dunida ee baahsanaanta diimaha

## Soo jeedinta Habka Dhigista

- Isla falanqayn
- Dood
- Ku soo bandhigida muuqaal iyo qoraal
- Soo jeedinta
- Faah faahinta

## Soo jeedinta agabka dhigista

- Khariidada diimaha ee dunida.

## Cashar diyaarnta ka hor

- Isku dey inaad heshid xogta tiro-koobka diimaha
- Ardaydaadu ha soo qoraan sida ay diimuhu ugu faafeen dunida korkeeda

- Khariidada diimaha ee dunida.
- U sii shaqo guri koox ahaan si ay u ogaadaan ahmiyada diimaha

## Qiimaynta

- Qeex waxa ay diini tahay?
- Tax (qor) diimaha dunida adiga oo ku muujinay khariidada dusheeda meesha sida wayn loogaga dhaqmo.

## Tixraacyada


- Chandra R.C, juqraafiga tirada dadka madbacada Haalway, saxaafada ee oxford, Newyork.
- Mayhewu, qaamuuska juqraafiga jaamacada saxaafada oxford, Newyork
- Jackson R.H iyo hudman L.E, juqraafiga dhaqameed, deegaanka iyo goobaha dadka, shirkada daabacaada galbeed, New York 1990.


## 1.4.1 Bilowgii kacaaankii warshadaha

**Bilaabida waxqabadka**

- Weydii Ardayda wax ku saabsan nooc ka mid ah mishiin ama qalab kaas oo ay ku haystaan guryahooda
- Maxaa looga jeedaa kacaankii warshadaha?
- Xageebaad u malaynaysaan in uu kacaankii warshaduhu ka bilaabmay iyo siduu ku bilaabmay?

**Furaha ereyada (kelmadaha)**

- Kacaankii warshadaha
- Ingiriiska
- Mishiinka uumiga

## Hababka Wax qabadka

- Kacaankii warshaduhu wuxuu ahaa laga bilaabo xiliadii qarniyadii 18$^{aad}$ ilaa 19$^{aad}$ halkaas oo isbedeladii ugu waawaynaa ee dhinacyada beeraha, waxsoosaarka warshadaha, macdan qodista, iyo gaadiidka oo si aad u qoto dheer saamayn ugu yeeshay xaaladihii bulsho-dhaqaale iyo dhaqan

ahaaneed kana bilaabmay dalka Ingiriiska. Kadibna si ku daba xigta ugu fiday dhamaan yurub, Waqooyiga Ameerika aakhirkiina dunida gaadhay.

- Weerarkii ugu horeeyay ee kacaankii wrshaduhu wuxuu si muuqda wax wayn ka badalay taariikhda aadamiga.
- Kacaankii warshadaha waxaa laga tixraacaa kala guurkii wax soosaar gacmeedka looga gudbay wax soosaar mishiineedka waxsoosaarku wuxuu ka tagay guriga ilaa warshada ama nidaamka arimaha gudaha ee guriga ilaa nidaamka warshadeed.
- Ugu horaynba kacaankii warshaduhu wuxuu ka bilaabmay qarnigii 18$^{aad}$ waxaa ku darsamay kacaankii warshadaha wejigiisii labaad agagaarihii 1858 kii markii horumar laga sameeyay tignoolajiyad ahaan iyo dhaqaale ahaanba awoodna lagu dhaqaajiyay.
- Horumarinta quwada uumiga ee maraakiibta marinada xadiidka tareenka iyo markii dambe oo qarnigii 19$^{aad}$ oo la helay mishiino leh gubashada gudaha iyo mishiino dhaliya quwada korontada.
- Bilaabashadii kacaankii warshaduhu wuxuu si isugu dhaw isugu xidhay tirooyin yaryar oo waxyaabihii la soo saaray ee wejiyadii 3$^{aad}$ iyo 4$^{aad}$ lana sameeyay badhtamaha qaybtiisii labaad ee qarnigii 18$^{aad}$.
- Waxyaabihii la soo saaray ee ugu muhiimsanaa waagaas wuxuu ahaa farsamada dharka, quwada uumiga iyo helitaanka birta.
- Mishiinka uumigu wuxuu ahaa soo saaridii ugu muhiimsanayd kacaankii warshadaha. Markii ugu horaysay waxaa adeegsaday macdan qodeyaasha dhuxul dhagaxda kadibna warshadaha dharka. Aakhirkiina waxaa loo diyaariyay isha ugu wayn ee quwada loogu tala galay warshadaha kala duwan ee balaadhan iyo qaababka gaadiidka.
- Soo saaridii mishiinadii cusbaa waxay keentay waxyaabihii uu kacaanku soo saaray.
- Kacaankii warshaduhu wuxuu bilaabmay waayihii koritaanka dhaqaale ee qofkiiba inta ku soo hagaagaysa wacnaa oo ahayd dhaqaalihii hantigoosiga,
- Joogitaanka balaaran ee ay sayladaha joogeen xoolaha la dhaqdo waxay sidoo kale mudnaanta siisay ahmiyadii wadaha ka ahayd kacaankii

warshadaha, si gaar ahna u sharxaysa sababtii uu dalka Ingiriiska uga dhacay.

## Soo jeedinta habka Dhigista

- Ku soo bandhigida muuqaal & qoraal
- Koox u falanqayn iyo soo jeedinta (tusaale: sababta iyo sida uu ku bilaabmay kacaankii warshaduhu)
- Sharaxida furaha ereyada iyo fikradaha
- Daraasadaha
- Su'aalo iayo jawaabo

## Soo jeedinta kaabayaasha dhigista

- Khariidada yurub
- Qaar ka mid ah sawirada mishiino ka mid ah kuwii la soo saaray xilligii kacaankii warshadaha
- Khariidada kala sarayneed ee dunida

## Cashar-diyaarinta ka hor

- Isku dey inaad heshid khariidada yurub
- Isku dey inaad raadisid sawirada ku tusinaya soo saarida Tignoolajiyadii mudadii waayaha kacaankii warshadaha.
- Isku day inaad heshid sawirada mishiinada, warshadaha iyo mishiinadii kale ee la soo saaray xiligii kacaanka warshadaha,
- Si shaqo guri oo akhris ah ardayda oo ku saabsan kacaankii warshadaha
- U dir shaqo guri hal ama laba arday oo loox ku soo sawira khariidada yurub.
- U habee ardayda kooxo yaryar koox kastana u calaamadi in ay soo jeediyaan waxa ay noloshu u ekayd xiligii kacaankii warshadaha.

## Qiimaynta

- Xagee buu kacaankii warshaduhu ka bilaabmay?
- Waydii ardaydu inay sharxaan wax ku saabsan waayihii kacaankii warshadaha
- Waydii ardayda waxa ay ahaayeen waxyaabaha ugu muhiimsanaa ee ay soo saareen Ingiriisku sannadihii 1700 dkii?

- Waa maxay sababta ay kula tahay in uu miishiinkii uumigu ahaa soo saaridii ugu muhiimsanaa kacaankii warshadaha?
- Maxay ahayd ishii ugu waynayd quwada mudadii kacaankii warshadaha?
- Ardayda u habee kooxo yar yar isla falanqeeyaanna waxa isbedelay, ee ay la tahay markii ay u dhaba galeen waayihii kacaanka warshadaha.

## 1.4.2 Saamayntii kacaankii warshadaha

**Bilaabida waxqabadka**

- U habee ardayda kooxo yaryar weydiina inay magacaabaan qaar ka mid ah raadreebyadii ugu muhiimsanaa ee kacaankii warshadaha.
- Ku dhiiri geli ardaydu inay qeexaan gumeysinimada ereyo ay iska leeyihiin
- Waa maxay sababta ay idiin la tahay inay waddamadii xooga waynaa u doonayeen inay gumaystaan waddamadii kale.
- Ardayda u habee kooxo yaryar una ogolow inay isla falanqeeyaan raadreebkii gumaystayaasha ee waddamadii ay gumaysanayeen ee Afrika
- Waydii ardayda inay magacaabaan waddankii/gobolka ugu muhiimsanaa ee ahaa maxmiyadii (mustacmaradii) tusaale wakhtigan xaadirka ah waddankii ka mid ka ahaa waddamada loo yaqaano "waddamada barwaaqo sooranka" ee uu gumaysan jiray Ingiriisku.

## Hababka waxqabadka

Kacaankii warshaduhu wuxuu lahaa natiijooyin xun iyo kuwo fiican labadaba:

- Warshadii hantigoosiga ama casriga ee keenay kacaankii warshadaha
- Burjuwaasiyiintii (hantigoostayaashii) iyo dabaqadihii shaqaaluhu waxay noqdeen labadii dabaqadood ee aasaasiga u ahaa hantigoosiga.
- Horaantii sannadihii kacaankii warshadaha dabaqadii shaqaalaha waxaa ay la kulmeen dhibaatooyin ad-adag oo ay kamid ahaayeen mishaar hoose saacadaha shaqo oo aad u dh/dheeraa xaalad shaqo oo liidata iyo shaqo la'aan aakhirkiina waxay iyaga laftigoodu isu habeeyeen qaab midow

ganacsato una dagaalama xuquuqdooda, dhibaatada shaqaale iyo warshadaynta.

- Kacaankii warshaduhu wuxuu u keenay faaiidooyin badan dadka oo ah qaab ka in badan oo cusub oo noocyada badeecadaha qiimaha hoose leh. Ay ka mid ahaayeen laakiinse dhibaatooyin hadana u keenay.
- Xaaladaha shaqo ee warshadaha oo aad u liidatay, mushaar hoose saacado shaqo oo dhaadheer, shaqo la'aan iyo caruur shaqaale ah kuwaas oo ahaa dhibaatooyinkii ka abuurmay kacaankii warshadaha.
- Soo if bixii waddaniyada ee reer yurub waxay ahayd natiijadii ka dhalatay kacaankii warshadaha. Waddaniyadu waa dareen daacadnimada. Qofka dareenkiisa oo dhan u jeedisa xaga waddankiisa/keeda. Qarnigii 19[aad] waddaniyadu waxay Jarmalka iyo Tadlyaaniga ka caawisay inay ku guulaystaan midowga
- Soo if bixii gumeystenimada waddaniyadu waxay sidoo kale ahayd. Dhinaceeda xun. Qiirada waddaniyadeed ee xoogani waxay u hogaamisay waddamadii reer yurub in ay aaminaan in ay dadyawga kale ka sareeyaan sidaa awgeed dareenkii waddaniyaadeed iyo baahidii alaabta cayriin iyo suuqyaduba waxay u horseedeen waddamadii reer yurub inay aasaasaan gumaysashadii Afrika kuna qabsaday habab milatari
- Gumeystenimada, waddaniyada, magaalo-garowgu waxay noqdeen qaar ka mid ah raadreebyadii saamaynadii ugu waawaynaa ee kacaankii warshadaha.
- Ka soo if bixii kacaankii warshadaha ee yurub wuxuu u kordhiyay hantidii iyo awoodii waddamadii reer yurub. Wuxuu sidoo kale u hogaanshay in ay ka dalbaan (u baahdaan) alaabta iyo suuqyo loo iib geeyo badeecadaha ay soo saaraan warshadahoodu. Dalabkaan ama baahidani waxay u horseeday reer yurub inay ku dhaqmaan nidaamka gumaysiga iyo qabsashada meelo la gumaysto. Sidaa awgeed gumaysiguna waa mid ka mid ah natiijooyinka kacaankii warshadaha.
- Ingiriiska, Faransiiska, Isbayn, Boortiiqiiska waxay ahaayeen gumaysteyaashii ugu waawaynaa kaas oo Ingiriisku ka qaatay qayb libaax

- Marka laga reebo dalkeenan Itoobiyaa iyo Laybeeriya dhamaan dalalka Afrika waxay ku hoos jireen xukunkii gumaystayaasha.

## Soo jeedinta Hababka Dhigista

- ✓ Ku soo bandhigida muuqaal iyo qoraal
- ✓ Koox-u-falanqayn iyo soo jeedin (Tusaale Dagaalkii Cadwa)
- ✓ Dood habaysan oo ah sawaxanka gumaysiga/gumaysiga cusub.
- ✓ Sharxida furaha ereyada iyo fikradaha
- ✓ Daraasado

## Soo Jeedinta Agabka kaabayaasha Dhigista

- Khariidada dunida ee gumaystayaasha
- Shawirada caruur ka shaqaynaysa warshad
- Sawirada geesiyaashii Itoobiya

## Cashar diyaarinta ka hor

- Isku dey inaad heshid khariidada ku tusinaysa taariikahdii gunaystayaashii dunida.
- U habee koox arday ah oo soo jeedisa noloshii Nelson Mandela iyo aasaasidii ururkii ANC
- Ku marti qaad khabiir si uu ugu soojeediyo ardayda
- U habee ardayda kooxo yaryar oo dooda weydiina inay fahmeen raadreebyadii gumaystaha
- Isku day in aad heshid khariidada Afrika si aad uga tustid waddamadii la gumaystay iyo cidii gumaysatay

## Qiimaynta

- Weydii ardayda inay sharxaan raadreebkii kacaankii warshadaha.
- Weydii ardayda inay sharaxaan sababiii iyo natiijooyinkii ka dhashay isbalaadhintii gumaystayaasha
- Weydii ardayda sababta ay quwadihii reer yurub ay u doonayeen inay maxmiyado ka samaystaan Afrika
- Weydii ardayda in ay isla falanqeeyaan waxa uu ahaa hawlgaladii ay dadyowga Afrikaanka ahi ugala soo horjeesteen isblaadhintii gumaystayaasha

- U habee ardayda kooxo yar yar waydiina inay tilmaamaan meelihii Afrika ee la gumaystay iyo cidii gumaysatay.

### Raad-reebkii kacaankii warshadaha oo meesheedii ka sii socotay

**Soo if-bixii Afkaarta cusub:** Dimoqraadiyada, xoriyadda, wadajirnimada.

**Bilaabida waxqabadka**

- Waa maxay Dimoqraadiyada habka aad ugu dhaqantid? U sharax fasalkaaga.
- U habee ardayda kooxo kala duwan una ogaolow inay soo bandhigaan fikradaha kala duwan xisbiyada. Iyo kuwa u ololeeya ee ka soo horjeeda. Waydii ardayda fasalka in la weeraro ama laga soo horjeesto fikirka xisbiyada. Ugu dambayn u ogolow inay isla falanqeeyaan talaabooyinka iyo nidaamyada aasaaska u ah doorashada Dimoqraadiyadeed.

## Hababka Wax-qabadka

- Horumarkii warshadaynta, fikiradihii cusbaa sida: Dimoqraadiyada, xoriyada wadajirnimada iyo shuucinimada waxay ahaayeen ahmiyadii koritaanka.
- Dimoqraadiyada: macnaheedu waa "maamulka shacabka" "waa hadyad" ama deeqdii Giriigii hore ugu deeqeen diinida. Giriigii hore waxay ahaayeen kuwii ugu horeeyay ee horumariyay nidaamka Dimoqraadiyadeed ee dawlad. Qaabka Dimoqraadiyad wuxuu ahaa mid lagu magacaabay "dimoqraadiyada tooska ah". Nidaamka dimoqraadiyadeed ee soo ururiya go'aan sameeyayaasha (sharci dejiyeyaasha) oo ah kuwa ay shacabku ku doorteen si xaq ah iyo doorasho xor ah. Fikrada casriga ah ee wakiilada dimoqraadiyadeed waxay noqotay mid si balaadhan ugu fida wadamadii warshadaha lahaa ee reer yurub qof waliba wuxuu leeyahay xuquuq in uu doorto lana doorto. Xuquuqaha shaqsiyeed waxaa ka mid ah in dadka laga tirada badan yahay la ixtiraamo.
- Nidaamka dimoqraadiyada waa mid lagu asteeyo mamulka sharciga, xoriyad, xaq, doorasho madaxbannaan, xaqa codbixinta guud ahaan ixtiraamka xuquuqaha aadmi iyo Dimoqraadiyadeed.

- Fikrada xoriyadu wuxuu ahaa sidoo kale fikrad si balaadhan u fiday Waxaaana la aaminsan yahay xor u-hadalka, dhaleecaynta, u madax bannaanida wax caabaudida iyo inay dadku dawlada la xisaabtamaan
- Wadajirnimaduna sidoo kale waxay ahayd fikir kale oo shaac noqday.
- Wadajirnimadu waa jiritaanka meel fog wax ka eegayaasha siyaasadeed ee kala duwan, kuwa aaminsan diimaha ama jinsiyadaha kala duwan ee gaar ahaan bulsho dhexdeeda ah. Waa mabda'a inay koox ahaan kala duwani si wada jira u wada noolaadaan. Wada-jirnimada waxaa looga jeedaa jiritaanka nidaamka xisbiyada badan.
- U habee ardayda kooxo yaryar waydiina inay islafalanqeeyaan kacdoonkii ay Afrikaanku kaga soo horjeedsteen is balaadhintii gumaystayaasha. Magacaw qaar ka mid ah kacdoomadii ka guulaystay maamukii gumaysiga ee ay ka soo horjeesteen.
- Waydii ardayda sababiii iyo natiijooyinkii ka dhashay dagaaladii koowaad iyo labaad ee dunida
- Waa maxay waxyaalihii kasoo if baxay labadii dagaal wayne?
- Wax fikir ah ma ka haysaan nuxurka Dimoqraadiyada, cusub?
- Maxay idinla tahay faaiidooyinka Dimoqraadiyada?

## Furaha Ereyada

- Kacaankii warshadaha
- Gumeysi
- Ciidannimo
- Nelson Mandela
- Ururkii Midowga Ganacsatada
- D.D.I iyo D.D.II
- siyaasada Gumeysiga
- ANC

**Dagaalkii I ee dunida**

## Hababka waxqabadka

- Yurub waxay u qaybsanayd laba gaashaan buurood oo cadow isku ah sannadkii 1914 kii
- Saddex-geesoodka Enteente-oo ka koobnaa Ingiriiska, Faransiiska iyo Ruushka
- Saddex-geeska isbahaysiga-oo ka koobnaa Jarmalka, Talyaaniga iyo Awsteriya-Hangary.
- Sababaha Dhaliyay D.D.I
- Siyaasad gumaysi

- Waddaniyadnimo
- Milaterinimo
- La'aanta urur caalami ah oo xoog badan oo waddamada ka caawin kara si nabadgelyo ah inuu ku dejiyo murannada.
- Maraykanku wuxuu dagaalka soo galay 1917kii oo uu la saftay dhinicii xulufada Ingiriiska. Aakhirkiina wuxuu dagaalkii soo af jarmay 1918kii waxayna guushu ku raacday qaramadii xulufada Enteete
- Natiijooyinkii Dagaalka malaayiin dad ah oo ku dhimatay jarmalka oo ku waayay mustacmaradihiisii kuna raacay (laga saxeexay) in uu bixiyo khasaarihii dhanka xulafadii ka soo horjeeday: waddamo madax bannaan oo yurub ka soo if baxay. Waddamadaas oo ay mid ahaayeen Boolaand, Yugoslaafiya, Hangary Jekoslafaakiya, waxaana kadib la aasaasay Ururkii Qaramada

**Dagaalkii Labaad ee Dunida**

## Hababka wax-qabadyada

- Sannadkii 1937kii xisbigii Naaziga ee Jarmalka, Faashiistihii Talyaaniga iyo Jabaankii Milatariga ahaa waxay samaysteen isbahaysigii loo yaqaanay dhidibadii Rooma-Tokyo-Baarliin
- Sababihii aasaasiga ahaa ee dagaalkii labaad ee dunida:
  - ✓ Dhidibkii milatarinimada: waxay soo saareen hub cusub iyo xirfadaha dagaalka
  - ✓ Dhidibkii waddaniyadnimo: waxay raaceen qiiro waddaniyadeed oo aad u ciriiryon. Waxay laf-ahaantoondu isu tixgliyeen inay dadka ka sareeyaan looguna tala galay inay dad aad u yari talada maamul oo dhan iska leeyihiin.
  - ✓ Dhidibkii siyaasada gumaysi: waxay ku andacoonayeen inay dhul iyo khayraad la' aani hayso. Waxayna qorshaysteen fuliyeenna odhaahda balaadhinta xuduudaha maamul.
- Gardarradii dhidibadu waxay rabsho geliyeen heshiisyadii waawaynaa ee caalamiga ahaa ee nabada. Waxayna sidoo kale. Ka baxeen ka mid ahaanshihii Ururkii Qaramada

- Faafintaankii dagaalkii II ee dunida: Bishii Sebteembar 1 deedii 1939 kii ciidamadii Jarmalku waxay galeen Boolaand. Laba maalmood kadibna, Faransiiska iyo Ingiriislima waxay ku dhawaaqeen dagaal ka dhan ah Jarmalka
- Jabaanku waxay u shiraacdeen si yaab leh ayaga oo u weeraray cutub ciidamada badda oo uu lahaa Maraynkaka oo ku sugna dekedii Biiral-Haarbar ee Haaway bishii Diisambar 31 keedii 1941, maalintii xigtayna Maraykanku wuxuu ku dhawaaqay dagaal ka dhan ah Jabaanka. Markii uu tani samaynayay Maraykanku wuxuu ka mid noqday dhinacii gaashanbuurta ee dagaalku ka dhan ka ahaa. Talyaaniga iyo Jarmalkii waa la galay. Hitler isaga laftigiisa ayaa is dilay bishii abriil 30 keedii 1945 kii jarmalkuna sideed cisho kadib wuu is dhiibay. Jabaankuna sidoo kale wuu is dhiibay kadib markii uu Maraykanku ku tuuray Bambooyin Atoomik Niyuukliyeer ah magaaloyinkii Hirooshiima iyo Naagasaaki Bishii Agoost 6 deedii iyo 9 keedii 1945 kii
    - ✓ Dagaalkii II ee dunidu wuxuu soo gabagaboobay 1945 kii guushuna ku raacday waddamadii gaashaan buurta
    - ✓ Natiijooyinkii Dagaalkii II ee dunida:

- Dhimashada malaayiin dad ah.
- Waxaa soo if baxay quwadihii waawaynaa ee Maraykanka iyo Ruushka dagaakii II ee dunida kadib.
- Waxaa la aasaasay Ururka Qaramada Midoobay

## Qiimaynta

- U habee ardayda kooxo yar yar una dir inay soo jeediyaan sababihii iyo natiijooyinkii labadii dagaal wayne

Kacdoonkii iyo iska caabintii ay Afrikaanku kaga soo horjee steen

### Isbalaadhintii gumaystaha

Bilaabida wax-qabadka

- U habee ardayda kooxo yaryar waydiina inay isla falanqeeyaanna sababta ay Itoobiya madax-banaanideedu uga reebanayd maamulkii gumaystaha.

- Waa maxay sababta geesiyaashii waddaniyiinta ahaa ee Itoobiya ay uga soo horjeesteen xukunkii gumaystayaasha.
- Waydii sidoo kale waxa ay casharka ugu sawiran karaan waddanyiintii Itoobiya iyo doorkii ay ka cayaari lahaayeen wakhtigooda ugu wanaagsan Itoobiya (tusaale: la dagalanka saboolnimada, HIV/AIDS, musuqa i.w.m.)

## Hababka wax qabadyada

- Dagaalkii Cadwa wuxuu ahaa kacdoonkii lagu guulaystay ee lagaga soo horjeestay gumaysiga. Guushaas ifaysay ee Cadwa waxay awood u siisay dalkeenan Itooobiya inay adkeeyaan madax banaanideena
- Jabhadii Ashaantigu (hada Gaana loo yaaqaan) oo qarnigii 19$^{aad}$ ah iyo jabhadii Majimaji (hada Taansaaniya loo yaqaan) waxay kacdoon kala soo horjeesteen xukunkii gumaystaha laakiin markii dambe inay iska caabiyaan la fashiliyay si waxashnimo lehna loo jebiyay
- Golihii waddaniyiinta Afrikaanka (ANC) ee Nelson Maandeela Aasaasay si uu ula dagaalamo nidaamkii midab takoorka → qaabka ugu xun ee midab-kala sooc.
- Intii udhaxaysay labadii dagaal waxay ku fakarayeen qaab cusub. Qaarka mid ah xisbiyadii siyaasadeed waxaa ka mid ahaa:
    - Ururkii Dhalinyarada Kikuuyada → oo la sameeyay 1921 kii dalka Kenya.
    - Ururkii xidhiidhka kikuuyada → oo la sameeyay dabayaaqadii 1920 meeyadii
    - Xisbigii Dimoqraadiga Qaranka → oo la sameeyay 1922 kii dalka Aljeerya.
    - Golihii waddaniyiinta Afrikada Galbeed
    - Xisbigii Neo-Destuur ee Tuuniisiya
    - Xisbigii Wafd ee Masar.

**Koonfurta Afrika iyo ANC:** inkastoo ay koonfurta afrika ka xorowday Ingiriiska 1910 kii dawladu waxay ahayd mid ay xukumayeen cadaanka laga tirada badan yahay. Xukuumadii cadaanka ahayd waxay hirgelisay siyaasada

loo yaqaano midab-takoorka. Midab-takoorku waa mid dadka kala saaraya oo eegaya dhinaca Isirka.Tani waxay horumarisay una horseeday soo if-bixii golaha Qaranka Afrikaanka (ANC) kaas oo habaysnaa oo ay dadka madow ee Afrikaanka ahi ka soo horjeedeen nidaamka midab-takoorka. Waana ta u keentay in uu Nelson Maandeela hanto awooda talada dalka 1990 meeyadii midab takoorkiina soo af-jartay.

## Soo Jeedinta Hababka Dhigista

- ✓ Ku soo bandhigid muuqaal iyo qoraal
- ✓ Koox- u falanqayn iyo soo jeedin (tusaale: Dagaalkii Cadwa)
- ✓ Sawaxanka doodo nidaamsan oo ku saabsan gumaysinimada/gumaysiga Cusub.
- ✓ Sharaxaada furaha ereyada iyo fikradaha ay ku bixinayaan daraasadaha

## Soo jeedinta Kaabayaasha Dhigista

- Khariidada ku tusaysa gumaysashadii dalalka dunida
- Sawirada geesiyaashii waddaniyiinta ahaa ee Itoobiya iyo kaariidada Afrika.

## Cashir-diyaarinta ka Hor

- Isku dey inaad heshid khariidada ku tusaysa taariikhdii isticmaarka dunida
- La hadal taariikhyahan si uu ugu soo bandhigo ardayda
- U habee ardayda koox soo jeedisa wax ku saabsan noloshii Nelson maandeela iyo aasaasidii ANC
- U habee ardayda kooxo yaryar oo dooda waydiina inuu sii socdo raadreebkii gumaystayaashu.
- Isku dey khariidada Afrika si aad ardayda uga tustid waddankii wax gumaystay iyo cidii la gumaystay.
- Habee qodob siyaabo kala duwan looga doodo qodob hoosaadyadiisuna ha noqdaan sida raadreebkii kacaankii warshadaha iyo labadii dagaal wayne ee dunida.

## Qiimaynta

- U habee ardayda kooxo kala duwan una dir inay soo qoraan soona jeediyaan wax ku saabsan jabhadihii Ashaantiga iyo Maji–Maji, dagaalkii Cadwa, kacdoonkii Samoore tuure ay kaga soo horjeedeen xukunkii gumaystayaasha iyo waxa ay ahayd sababtii ay Afrikaanku u aasaaseen xisbiyadii siyaasadeed ee xiliyadii gumaysiga.
- Waydii ardayda Nelson Maandela iyo sababtii uu u aasaasay ururkii ANC?
- Weydii ardayda inay ka soo saaraan sababo ku saabsan sababtii ay waddamadu uu midba midka kale ula dagaalamay.
- Ku dhiiri geli ardayda inay islafalanqeeyaan odhaahdii ama maahmaahdii Balaato (plato's saying) "Dhimashadu waa waxa keliya ee la ogaado dagaalku marka uu dhamaado"
- Waydii ardayda sababihii iyo natiijooyinkii labadii dagaal wayne ee Dunida ee ku habsaday aadamiga iyo khayraadyadiiba.

## Tixraacyada

1. Furaha Juqraafiga ee GCSE, buugga-1.
2. Juqraafiga Dadka ( taxanaha moodheelada Juqraafiga ee longman ) M.E oo uu weheliyo Erick, 1990, UK
3. Midabka Webster ee Atlaska Dunida, New York
4. Atlaska Dugsiga casriga ah ee filibis (philip's) Ingiriiska, 1994.

# Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 1

**I. Ku qor Run ama Been**

1. Been
2. Run
3. Been
4. Run
5. Run

## II. Isku Aadi

| | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | B | 2. | Kh | 3. | S | 4. | R | 5. | SH |
| 6. | C | 7. | Q | 8. | J | 9. | X | 10. | T |

## III. Buuxi Meelaha Bannaan

1. Gobolka kul-dhexaadka
2. Yuhuuda, Masiixiga iyo islaamka
3. Alaab cayriin, shaqaale jaban iyo suuq-qalaad
4. Xisbiyada badan
5. Dilkii Aarkaadhiyuuka Ferdinaand

## IV. Ka dooro jawaabta saxda ah

1. J
2. X
3. B
4. T
5. J
6. X

## V. Jawaabo Kooban

1. Sababtu waxay ahayd ingiriiska oo soo maray marxaladaha ay ka mid ahaayeen:

- Kacaankii beeraha
- Kacaankii ganacsiga
- Arsamadii cudbiga dharka laga sameeyo oo sare u kacday.

Horumarkii ay ka gaadheen qodobadaan iyo hindiseyaashii aqoonyahanada kala duwan ee u dhashay dalka ingiriisku waxay u horseeday nidaamka warshadaynta oo sare u waaday dhaqaalihii dalka iyo adeegyada ay ka midka ahaayeen:- caymiska Bangiyada, isku xidhka shirkadaha, Maraa kiibta

2. Arrimaha duleed ee saamaynta ku leh baahsanaanta tirade dadka waxaan ku soo koobi karnaa:

- Kulaalayaasha ama Gobolada aadka u kulul oo ay ku nool yihiin dadyawga ugu saboolsan dunida
- Gobolada kul-dhexaadka oo ay ku nool yihiin dadyawga ugu hodansan ee horumaray
- Gobolada qaboobaha ama cidhifyada barafka leh oo ay ku nool yihiin dadyaw tiroyar oo aan horumarsanay.

3. Sida aynu wada ogsoon-nahay Dhamaan ilbaxnimooyinkii hore ee dunida soo maray waxay ka soo if baxeen agagaarka webiyada.

Guulihii ay gaadheenna waxaan ku soo kobi karnaa:

- Far ama qoraal
- Tirsiga taariikhda sida: sannadka Bisha, todobaadka iyo saacadaha maalmaha.
- Qalabka lagu waraabiyo beeraha
- Qalabka dagaalka i.w.m

4. Waxtarka ay webiyadu leeyihiin aad iyo aad ayay u badan yihiin, waxaanse ku soo koobi karnaa:-

- Waraabka beeraha
- Dhalinta Quwada korontada
- Gaadiidka biyaha mara
- Warshadaha waawayn i.w.m

# CUTUBKA 2 XOOGAGA WAX KA BEDELA OOGADA SARE EE DHULKA

## 2.1 Xoogaga gudaha iyo saamayntooda nolosha Aadamiga

***Tirada xiisadaha: 5***

### 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan dhigista

***Markii uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Sharaxaan quwadaha wax ka badala oogada sare ee dhulka*
- *Sheegaan saamaynada ay quwadaha  gudaha ee dhuku ku leeyihiin oogada beriga iyo nolosha aadmiga*

### 2. Tusmada

- Dhul-gariirka
- Foolkaanaha
- Laalaabka
- Dil-dilaaca

### 3. Araar

Quwadaha gudaha iyo dibadu waa kuwa sababa qaabaynta dhulka oogadiisa sare. Waa nidaam soo socday 4.6 bilaynkii sano ee la soo dhaafay. Barashada cutubkani waa mid lagu talin karo kulamada ka dhacaya meelaha ka baxsan fasalka. Sawirada foolkaaneyaasha ku tusa, magaalooyinka uu baabiiyay dhul gariirku, goobaha uu caro-guurku asiibay iyo sida ay dadka degaamada gaarka ahi ula qabsadeen masiibooyinka i.w.m. Aalaaba waxaa lagu sheegaa “Laantu ama maadadu waa shaybaadhka barashada juqraafiyeed”. sidaa darted waa run inuu ku taxaluqo barashada bulshada.

Maadaama buuga ardayga ee wakhtigan xaadirka ah lagu rajo wayn yahay in uu in badan mid soo jiita noqon doono, barayaasha waxaa lagula talinayaa inay ardayda ku dhiiri geliyaan u isticmaalida ama si aad ah u adeegsiga. Hubi in ardaydu dhamaystireen hawlgaladii iyo laylisyadii lagu siiyay ardayda buugtooda. Buugga ardayga waxaa lagu siin karaa shaqo guri.

Halkaan, wixii qiimaynta ka hooseeya iyo gacan ka qabshadaba waxay tilmaamaysaa eber.

Laylisyo dheeraad ah iyo shaqooyin guriyada loo diraba waa kuwo loo soo jeediyay si ka sareysa guulaystayaasha.

## 4. Hababka Baris – barashada

### 4.1 Soo jeedinta kaabayasha iyo tixraacyada

Atlaska cusub (ee Amxaariga la daabacay, 2002)

### 4.2 Soo jeedinta hababka dhigista

- Faahfaahin
- Islafalanqayn
- Koox- hawleed
- Daraasad (u kuurgelida goob)

### 4.3 Cashar-diyaarinta ka hor

- Diyaarso khariidadda gobolka, Itoobiya ama Afrika si aad ugu tilmaantid baahsanaanta meelaha ama aagaga foolkaanaha iyo dhul garirka waawayn.
- Sawirada ku tusinaya foolkaanayaasha, magaalooyinka ay dhulgariiradu baaba‘sheen.
- Atlaska cusub koobigiisa
- Goob dhisme dugsi ku yaalo, halkaas oo ay ardaydu ku muujin karaan foolkaane

## 4.4 Soo Bandhigida Casharka

**B. Hordhaca Casharka**

Kadib marka aad dareenka ardyda kicisid, waad u bilaabi kartaa casharka adiga oo sare ugu qaadaya sida su’aalahan soo socda oo kale:

- Qofkee baa khibrad u leh (soo arkay) dhul gariir? Maxaa ku dhaca muuqaalada dabiiaga ah iyo kuwa dad sameega ah? Maxaad ka og tahay dhul gariirada dhawaan ka dhacay dunida? Waa maxay Sunaami?
- Laga soo bilaabo casharadii fasalka 7$^{aad}$, maxaad ka xusuusan tihiin dulaha rifanka iyo lisanku ku dhacay dhaqdhaqaaqyada qaaradaha, laalaabka iyo dililaacyada ka dhacaya ee xariiqaha dilaaca agtooda ?
- Weligaa "TV" ga ma ka daawatay folkaanaha furfircoon? Maxaad dareenteen markii aad daawateen filimka diiwaaneed (dhokomanatiyeed) ee Ertaale?

**T. Nuxurka Casharka**

- Waydii arday xoogaa ah suaalo isku mid ah kana dooro jawaabta saxda ah
- Adeegso tusaha ku yaalla buuggaagtooda ardayda, sharaxaadna ka bixi natiijooyinka dhul gariirada laxaadka kala duwan
- Adeegso khariidada (jaan: 2.1) ee buugga ardayga, sharaxna ka bixi sadexda suun ee dunida halkaas oo uu caan ka yahay dhul gariiradu
- Kumanaan jasiiradood oo taxan oo laga helo badwaynta baasifiga ayaa Jira. (tix-raac Addis Atlas bogiisa 68) ku dhawaad dhamaantood waxay ka samysmeen natiijada foolkaanayaasha. Falanqeeya samaysankooda
- Falanqeeya saddexda nooc ee foolkaanaha,
- Adeegso warqad ama kartoon adag, ku muuji laalaabka, quwadaha cabudhka iyo cadaadiska
- Ardaydu ha bilaabaan inay sameeyaan moodheelo (wax u taagan) dooxada Rifti iyo buuraha seked-sekedda ah. Iyaga oo u adeegsanaya agabka laga helo agagaarkooda

## 4.5 Qiimaynta iyo La socodka

**B. Qiimaynta**

Waydii ardyda su'aaalahan soo socda oo kalae:-

- Maxaad ka fahamteen dhul-gariir, folkaane, laalaab, iyo dildilaac?
- Ertaale Deegaankee bay ku taalaa?

- Tusaaleyaal ka bixi buuraha laalaabka ee qaaradaha kala duwan?

**T. La socodka**

- Ku bilow ardaydu inay kooxo u falanqeeyaan sida quwadaha guduhu ay masuulka uga yihiin wax ka badalka oogada sare ee dhulka
- Waydii inay warqad adag oo sida tabeelaha oo kale ee soo socda ugu sameeyaan una buuxiyaan xogta ku haboon ee dhacdooyinka waayadan dambe. U ogolow inay ka baadigoobaan buuggag iyo wargeysyadaba

| **Dhulgarur/ Foolkaana** | **Sanadka** | **Halka laga helo** | **Tirada dhimashada** |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

# 2.2 Xoogaga Dibada Iyo Saamayntooda Nolosha Aadmiga

**Tirada xiisadaha: 5**

## 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan dhigista

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Sharaxaan quwadaha dibada ee wax ka badala oogada sare ee dhulka*
- *Garwaaqsadaan saamaynada carroguurrka iyo tuulimaadka ee oogada berriga.*

## 2. Tusmada

- Burburinta (cimilowga)
- Carro guurka
- Tuulimaadka

## 3. Araar

Waxaynu mar horba ku soo cadaynay ciwaankii hore in quwadaha gudaha iyo dibada ay sababaan qaabaynta dhulka oogadiisa sare. Muuqaaladu hal mar oo kaliya ayay ka samaysamaan quwadaha gudaha, quwadaha dibaduna waxay u raacaan si siman oo aan qoto dheerayn, si ay dib ugu qaabeeyaan oogada dhulka. Uma baahnid ayaa dhici karta inaad u safartid meel fog si aad u aragtid qaababka dhulka ee ay qaabeeyeen quwadaha dibadu ardaydu waa inay bilaabaan si ay ugu kuurgalaan una fahmaan deegaanka dabiiciga ama muuqaaleed.

## 4. Hababka baris-barasho

## 4.1 soo jeedinta agabka dhigista iyo Tixraacyada

- Meelaha nabaad guuray ee kuu dhow
- Tog ama webi (aan gu'in ama xiliyeed) oo aad u kuurgashid biyo dhacyada webi
- Sawiro

## 4.2 Soo jeedinta Hababka Dhigista

- Sharaxaad
- Falanqayn
- Daraasad ( u kuur gelid ) goob

## 4.3 Cashar diyaarinta ka hor

Diyaar garow ka hor inta aadan samaynin:

- Xulashada goobaha ku tusiinaya muuqaalada ay sameeyeen caro guurka iyo tuulimaadka
- Sawirada ku tusinaya barnaamijyada dhawritaanka ama daryeelka.

## 4.4 Soo badhigida Casharka

**B. Hordhaca casharka**

Kadib marka aad dareenkooda aad kicisid waad bilaabi kartaa casharka adigoo su'aalahan oo kale weydiinaya:

- Maxay yihiin quwadaha gudaha iyo dibada ee aad cashirkii hore ku soo barteen?
- Maxay yihiin quwadaha dibadu?

**T. Nuxurka Casharka**

- Sharax burburin , caro- guur, raritaan iyo tuulimaad
- Ku muuji sida ay burburintu uga dhacdo adigoo ku muujinaya dhagxaan aad tusaale ahaan u qaadatay oo ku saabsan kuwo fiiqmay (diirmay)
- Sharax dabeecadaha wabiyada biyodhacyada iyo biyo shubyada kala duwan.
- Sawir tuse, sida kan hoose oo sabuurada ama warqad adag dusheeda ah si wadajir ah ula dhamaystir ardayda.

| Wabi | Biyo shub sare | Biyo shub dhexe | Biyo shub hoose |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

- Qaado webi laga helo degaankiina isla falanqeeya saamayntood xun iyo fiican ee ay ku leeyihiin nolosha dadyawga dagaankiina
- Ku bilow ardaydu inay akhriyaan qodobada ay ka soo qoreen buuggaag ama maqaallo (wargeysyo) goobaha sida godadka suufi cumar, biyo dhaca tis isaat, dhul faafka Niil, lamadegaanka saxaaraha.

## 4.5 Qiimaynta iyo La socodka

**B. Qiimaynta**

Weydii ardayda su ‘aalahan oo kale

- Maxay kala yihiin waxyaalaha ugu waawayn ee carro-guurka dhaliya?
- Maxay kala yhiin saddexda ugu waawayn shaqooyinka webiga?
- Dadku xagee bay ka helaan camuuda ama ciida ay u isticmaalaan shaqada dhisitaanka waa maxay sababta ay halkaas uga dhisaan?

- Ku bilow kuna dhiirigeli ardayda inay daraasad ku sameeyaan carroguurka iyo tuulimaadka nidaamyada wadadooda markay Dugsiga tagayaan agtooda ah iyo dagaankoodaba.
- Qaado tog ama webi aan gu'in ama xilliile ah oo laga helo dagaamadiina. U ogolow inay daraasad ku sameeyaan iyaga oo weydiinaya xubno ka tirsan bulshada. Meesha ay tahay isha biyuhu uga imanayaan harada ama webiga? Waxa ay yihiin muuqaalada ay ku barbar arkeen biyo shubyadooda? Sidee bay u samaysaa deegaanka? Sidee bay dadka bulshada dhexdeeda ah uga faaiidaystaan toga ama webiga?

## 2.3 Cabbiraada Fogaanta Iyo Bedka Khariirada Korkeeda

**Tirada Xiisadaha: 6**

### 1. Ujeeddada gaarka ah ee ugu yaraan dhigista

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-***

- *Qeexaan qiyaas cabbirka*
- *Magacaabaan hababka kala duwan ee lagu sharxo (muujiyo) qiyaas cabbirka*
- *Xisaabiyaan isku bedelka qiyaas cabbirka*
- *Xisaabiyaan fogaanta dhulka (dhabta) iyo bedka qaabsame ee jaantusyada khariidada.*

### 2. Tusmada

- Macnaha qiyaas cabbirka
- Hababka lagu sharxo qiyaas cabbirka
- Isku bedelka qiyaas cabbirka
- Raadinta fogaanta dhulka ee khariidada
- Xisaabinta bedka qaab same
- Is barbardhiga qiyaas cabbirada.

## 3. Araar

Akhriska khariidaduhu waa waxyaalaha aasaasiga u ah ee maadada cilmiga bulshada. Xirfadaha aasaasiga ah ee khariidadadaha dushooda hadii aan lagu siinin ardaydu waxay kala kulmi doonaan dhibaato xaga fahamka ah oo ku saabsan warbixinada kala duwan ee lagugu siiyay khariidada dusheeda.

In layaqaano in cilmiga (aqoonta) xirfadaha iyo aragtiyada lagu horumarinayo barashada khariidadaha maaha oo kaliya aasaaska xeerarka Manhaj ahaaneed (Akadamiyeed) balse nolosha maalin kasta ay ku xidhan tahay.

Khariidadaha ama Atlasyada, la xiriira heerka Fasalka ardaydeenu maaha kuwo si sahal ah loo heli karo. Waxaa laga yaabaa in khariidadaha lagu soo bandhigay si adag oo dhib badan oo ciriiri ah oo leh war bixino xaddhaaf ah, sidaa darteed waa laga mamaarmaan in loo dhigo ardayda, sida loogu bilaabayo horayna loogu sii wadayo akhriska khariirada si talaabo talaabo ah, iyada oo shiishka la saarayo oo keliya hal muuqaal isla hal wakhti. Haddii dadka la soo bandhigayo dhamaan ujeedooyinka khariiradaha (muuqaal iyo siyaasadeed), waxay kala kulmayaan dhibaato inay akhariyaan khariiradaha Atlasyada qaarkood ee ay sawireen Satalaytku waa kuwo in badan lagu wareero. Sidaa darteed baruhu wuxuu u baahan yahay inuu xusho noocyada khariiradaha ugu sahlan (fudud) ee heerka Fasalka iyo la xiriira baahida dagaanka. Horumarinta xirfada akhriska khariiradaha waxay u baahan yihiin shaqooyin gacan ka qabad ah, maaha oo keliya Fasalka dhexdiisa balse fasalka dibadiisa ee goob ama meel inta ay xiisaduhu socdaan kuma filla in lagu dhamaystiro casharka, waxaa lagu horumarin karaa in la siiyo ardayda shaqooyin guri.

## 4. Hababka baris-barashada

### 4.1 Soo jeedinta kaabayaasha dhigista iyo tixraacyada

- Mastarad
- Xariga lagu cabbiro
- Khariidada gidaarada
- Atlas (Buug tibaaxeedka khariiradaha)

## 4.2 Soo Jeedinta Hababka dhigista

- Sharaxaad
- Layli (shaqo fasal)
- Koox hawleed (cabbiraada dhererka khariirada dusheeda iyo raadinta fogaanta dhulka oo la isticmaalayo qiyaas cabbirka)

## 4.3 Cashar-diyaarinta ka hor

- Samayso mastarado iyo xarig cabbireedyo
- Khariidada gobolka ama Itoobiya

## 4.4 Soo bandhiga casharka

**B. Hordhaca casharka**

Markii aad dareenkooda kicisid kadib waa u bilaabi kartaan casharka adoo su'aalahan oo kale weydiinaya

- Jahadee buu dhacaa ama laga helaa gurigiinu? Ma cabbiri ama qiyaasi kartaan fogaanta uu u jiro dugsiga oo km ah?
- Waa maxay warbixin sideyaasha khariiradu? Maxaa ka mid ah?
- Warbixin sidayaasha ugu muliimsan ee in si sax ah loo ogaado fogaanta u dhaxaysa laba meelood?

**T. Nuxurka casharka**

- Sii ardayda qeexida qiyaas cabbirka. Adiga oo adeegsanaya qeexida lagugu siiyay buugga ardayga. Qiyaas cabbirka waa habka metelaya fogaanta dhulka oo uu weheliyo dhererka khariirada dusheeda.
- Sharax kelmadaha ama weedhaha hoosta ka xariiqaan
- Faahfaahi saddaxda hab ee kala duwan ee lagu muujiyo qiyaas cabirka
- Sii tusaaleyaal badan oo ku saabsan layliyada sidii ay qiyaas cabir ugu bedeli lahaayeen mid kale.
- Ka caawi ardayda sidii ay u heli lahaayeen fogaanta dhulka ee u dhaxaysa laba meelood una adeegso qiyaas cabbiro kala duwan.
- U ogolow inay cabbiraan baaxada fasalkooda; Sekeda Garoonka ciyaaraha iyo Dhismaha Dugsiga
- Xusuusi had iyo jeer Dhismaha Dugsiga

- Xusuusi had iyo jeer inay marka hore u bedelaan dhererka oogada khariidada fogaanta dhulka
- Ka caawi ardayda inay helaan baaxada dhabta ah ee bedka qaabsame.
- Hel buugga Atlaska oo fur bogga 10$^{aad}$ halkaas oo ay ka muuqato Addis ababa. Adeegso khariidadaha kala duwan ee qiyaas cabbirada isbarbar dhigna xogtooda. Waxaad ka tixraaci kartaa Addis-Atlaska bogiisa 10$^{aad}$.

## Qiimaynta iyo La socodka

**B. Qiimaynta**

Weydii suaalaha sidan oo kale

- Qeex qiyaas cabbir?
- Maxay kala yihiin saddexda hab ee qiyaas cabbirka lagu sheego?
- Faahfaahi nidaamka lagu xisaabiyo bedka goob dhul beereed oo lagu siiyay qiyaas cabbirkooda?
- Waa maxay fogaanta u dhaxaysa baraha A iyo B

**T. La socodka**

- Hubi in arday kastaa dhamaystiray hawlgladii iyo laylisyadii lagu siiyay buugga ardayga
- Adeegso talaabo cagtooda ah oo ay ku cabbiraan fogaanta, una ogolow inay sawiraan khariidada goobta ay degan yihiin ama " xaafada"

U ogolow inay u bedelaan talaabada cagtooda sentimtiro iyo ugu dambayn mitiro.

# Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 2

## I. Ku qor Run ama Been

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. | Been | 2. | Been | 3. | Run |
| 4. | Run | 5. | Been | | |

## II. Buuxi meelaha Bannaan

1. Riktarka
2. Dooxo
3. Burburinta (cimilowga)
4. Folkaanaha Firfircoon
5. Qiyaas cabbirkh

## III. Ka Jawaab

1. Saddexda suun ee ugu waawayn ee caanka ah ee dhulgariirada waxaa ka mid ah:
   - Agagaaraha xeebaha Badwaynta Baasifiga
   - Bartamaha Badwaynta Atlaantiga oo dhereran waqooyi ilaa koonfurta.
   - Mid ka gudba qaaradaha yurub iyo Aasiya laga bilaabo xeebaha Galbeed ilaa xeebaha Bari.

2. Faa'iidooyinka ay foolkaaneyaashu leeyihiin waxaa ka mid ah:-
   - Agagaarka meelaha uu foolkaanuhu ka dhaco inta badan waxay leeyihiin oo ay hodan ku yihiin macdanta carrada nafaqaysa.
   - Haro-boholeedyo soo jiidasho fiican oo dhinaca dalxiiska ku haboon
   - Biyaha kulul oo leh ahmiyad xaga caafimaadka ah i.w.m

3. Muuqaalada ugu muhiimsan ee dooxada Rifti ay leedahay waxaa ka mid ah:
   - Waa dooxada ugu dheer dunida
   - Waa mid cidhiidhi ah oo leh dhinacyo janjeedha iyo sagxad siman
   - Waa mid cidhiidhi ah oo leh dhinacyo janjeedha iyo sagxad siman
   - Harooyin badan
   - Foolkaaneyaal firfircoon
   - Biyo kulul

4. Dhuxul dhagaxdu hababka ay u samaysantay waxaa ka mid ah:
   - Hab ka soo jeeda noolaha (Dhirta iyo xayawaanka)
   - Hab ka soo jeeda ma noolaha (Dhagxaanta)

5. Dabeecadaha uu leeyahay biyo-shubyada webiga Abay waxaa ka mid ah:-
   - Biyo-shubka hore:- waa biyo-shubka loo yaqaano Tis-isaat oo leh ku darayaalka kala ah: Beshilo, Jema mugger, Guder, Didesa, Dabus iyo Beles waxayna ugu deeqaan muga ugu way nee biyaha.
   - Biyo-shubka dhexe:- dooxadu waxay leedahay dabeecadahan:
   - Janjeedh aadu debecsan

- Webi qalooca oo muuqan kara
- Dooxo sagxadeedu balaadhan tahay, muga biyuhuna kordhaan
- Biyo-shubka hoose:- waa qaybtaleh dabeecadahan:
- Webiga oo u qulqula si tartiib ah oo dhinac-dhinac u socda shaqadusa

Kuwaas oo malaayiin sanno ka ugu hor aasmay kadibna ay saamayn wayn ku yeesheen cubudh iyo cadaadis aad u baan islamarkaana ka dhigay dhuxul-dhagaxda oo manta ka mid ah noocyada shidaal ahaan looga faaiidaysto ugu muhiimsanna tahay bacaadsaar.

## IV. Hawl khariiradeed

Haka soo shaqeeyaan Ardaydu iyaga oo adeegsanaya khariirada Itoobiya

## VI. Hawlgal

Haka soo shaqeeyaan Ardaydu

CUTUBKA 3

# SAAMEYNTA AADAMUHU KU LEEYAHAY DEEGAANKA

## 3.1 Xidhiidhka Aadmigu La Leeyahay Khayraadyada Dabiiciga Ah

**Tirada xiisadaha: 4**

### 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Marka uu cashirku dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Qaadaa dhigaan saamaynta dhaawacida khayraadyada dabiiciga ah ee geyiga*
- *Ka qayb qaataan wax-qabadyada lagu daryeelayo khayraadyada goobahooda ay degen yihiin*
- *Magacaabaan wasakheeyayaasha ugu waawayn ee biyaha iyo hawada*

### 2. Tusmada

Xidhiidhka uu aadmigu la leeyahay khayraadyada dabiiciga ah

- Baadka (Dhirta)
- Biyaha
- Hawada
- Carrada

Sababaha iyo saamaynada ka dhasha kululaanshaha dunida

- Sababaha dhaliya aduunyo kululaanshaha
- Saamaynada aduunyo kululaanshaha

## 3. Araar

Waxaa dusha laga saaraa deegaanka dabiiciga ah natiijada ka tirada dhibaatooyinka uugu daran ee saamaysay geyiga (dhir iyo xayawaanba) samafalka jinsiga aadamaha ahi uu sida wayn ugu tiirsan yahay waa baadka (dhir iyo cawsba) ku hagoogan dhulka.

Tusaaleyaalka qaarkood ee khayraadyada dabiiciga ah sida, carrada ee ay aadmigu baabiiyeen waxay wacyigelin u noqonaysaa dhibaatooyinkan iyo isku dayada ka qayb qaadan kara in la horumariyo hababka iyo nidaamyada kaas oo si gaar ah looga faaiidaysan karo deegaanka , ka faaiidaysiga gaarka ah ee macnaha buuxa leh waa in uu noqdaa mid lagu fulinayo la’aanta waxyaabaha ugu waawayn ee sababa isbedelada ku yimid isu dheelitirnaantii jaadadka dhirta iyo xayawaanka iyada oo loo eegayo deegaanka dabiiciga ah. Saadkii biyaha macaanaa ee wasakhoobay kaas oo aad looga qaylinayo. Dhibaatada ugu khatarta badan ee Aduunyada maalmahan ugu daran waa wasakhaynta hawada.

Siidaynta noocyada kala duwan ee gaasaska ilaha kala duwan oo ah kuwo dhibaato ku haya waxyaabaha uu ka kooban yahay Atmosfeerku. Deegaan kasta oo aadmiga waxqabadyadiisu saamaysay ugu yaraan isu dheelitirnaanta dabiici ee noocyada xayawaanka ee deegaan ku wada noolaa iyo dhirtii meel ka baxaysay ee xiriirka la lahayd deegaanka dabiiciga ah. Haddii saamaynta isku dheelitirkani uu yahay mid aad u sareeya waxaa loo yaqaanaa waxyeelayn.Tusaale ahaan xayawaanka ama dhirta noocyadooda waxaa baabiiyay aadamiga, kadibna hawlgaladii. Silsilada ahaa ee habaysnaa laga yaabo imay ka dhalato burburinta asalkii geyiga. Barayaasha waxaa si naxariis leh looga codsanayaa inay u soo bandhigaan (si qumman) su’aalaha iyagoo tixgelinaya faragelinta aadmi ee geyiga. U ogolow inay u falanqeeyaan koox ahaan si ay u wadaagaan fikradaha iyo waayo aragnimooyinka kala duwan Baruhu waa in uu haysta hagaha ama tilmaamaha raacana ardaydu si ay u fahmaan sdilsiladaynta sababaha iyo saamaynada geyiga ee uu ka masuulka yahay faragelinta aadmidgu.

## 4. Hababka Baris-Barashada

### 4.1 Soojeedinta kaabayaasha iyo tixraacyada

- Khariidada (Dhirta) iyo cimilada
- Khariidada dunida
- Sawirada

### 4.2 Soo jeedinta Hababka Dhigista

- Ciwaanka casharka oo kooban
- Koox u falanqayn
- Shaqo fasal
- Daraasad wadata warbixin qoran

### 4.3 Cashar diyaarinta ka hor

- Diyaarso ka hor inta aadan fasalka gelin khariidada Dhirta baadka dunida
- Sawiro kaam maraadeed iyo sawiro caadi ah
- Hawl galka (barnaamijka) iyo ujeeddada Daraasada

### 4.4 Soo bandliga Casharka

**B. Hordhaca casharka**

Kadib marka aad ardayda dareenkooda suaalo ka waydii casharkii hore ama kan cusub markaa kadib waad u bilaabi kartaa casharka.

- U soo bandlig su'aalahan oo kale
- Waa maxay geyi?
- Muxuu ka kooban yahay geyiga deegaan lagu siiyay
- Maxay ku tiirsan yihiin xayawaanka iyo dhirtu?
- Sidee bay aadamaha iyo deegaanku midba midka kale u saameeyaa.

**T. Nuxurka Casharka**

- Weydii ardayda waxa looga jeedo geyi adoo siinaya tusaale wakhtiga ay ku falanqaynayaan kooxda.

- Faahfaahi waxa looga jeedo geyi adigoo tusaaleyaal ka bixinaya
- Sharax khayraadyada dabiiciga ah ee ay aadmigu intifaacsadaan
- Sharax sida aadmigu uga mira dhaliyaan khayraadyadaa dabiiciga ah sida kaymaha, carrada, biyaha i.w.m iyo saamaynta geyiga
- U ogolow ardaydu inay u falanqeeyaan iyaga oo koox ah sida dhir-xaalufka iyo qodaal dhaqameedyada xun oo ay ka dhalato waxyeelaynta carrada, isbadalka cimilada abaar, lama degaamayn, ka qixitaanka xayawaanka duurjoogta ah oo ay ugu wacan tahay baabiinta sabadoodii.
- U ogolow ardaydu inay isla falanqeeyaan saamaynada isu tagay oo ah kuwo kharibaya geyiga guud ahaantiiba
- U soo jeedi daraasadaha una ogolow inay ardaydu ku xidhiidhiyaan daraasadahan wakhtigan xaadirka ee waxyeelaynta deegaanka ee ay sababeen dhir xaalufka saxanka Amasoon oo ay ugu wacan tahay qodaal hal nooc dhaqameedka (jeexida iyo gubida). U ogolow inay isugeeyaan wadarta dhibaatooyinka hab dhaqameedyadan ka dhalatay ee isbadalka cimilada aduunka
- U ogolow ardaydu inay ku xidhiidhiyaan daraasadaha kale ee la xiriira daaqsinta xad-dhaafka ah iyo tirada dadka badan ee Bariga Afrika daaqsinta xad-dhaafka (daaqitaanka ay daaqaan lo aad u badani dhul cayiman i.w.m oo ka baxsan awoodii ay goobtu ku hayn lahayd) dahaar ka qaadida carrada oo sababta caro guur aad u daran. Dhir-xaalufka oo ay ugu wacan tahay tirada dad ee saaidka ah waa dhibaato kale oo ka jirta Bariga Afrika taasoo u hogaamisay abaaro ku soo noqnoqda mudo aad u gaaban inta ay isu jiraan iyo lamadegaanoobid u ogolw ardaydu inay ka tixraacaan jaantuska ku tusinaya Masaayda Kenya, reer guuraaga Canfarta Itoobiya.
- Isla falanqeeya sababaha iyo saamaynada hawada iyo biyo wasakhaynada. Laga bilaabo halka ay ka soo unkameen. U fasax ardayda inay isla falanqeeyaan koox ahaan wax ku saabsan wasakhaynta hawada iyo biyaha waayo aragnimadooda.
- Qaado magaalooyinaka qaar sida Addis Ababa, Adaama Bahirdar, Awaasa Jijgjiga i.w.m

Tusaale ahaan sida ay baabuurtu ugu siidaayaan qiiqa, shidaalka (batroolka) wax lagu karsado iyo warshadaha qaarkood. Ku xidhiidhi Daraasada Hidiya ee sida warsdhadaha. Sifaynta kiimikaad u saameeyaan biyaha iyo hawada iyo tala bixintooda ku saabsan cawaaqibka caafimaadka aadamiga.

- Faahfaahi sida beeraha loo isticmaalo kiimikooyinka sida: bacrimiyayaasha carrada, sunta cayayaanka iyo haramaha oo wasakheeya biyaha sababana cudurada ku dhaca aadamaha.
- U fasax ardayda inay isla falanqeeyaan faaiidada iyo faaiido darada wadada xadiidka ee tareenka, wadada gaadiidku maro wasakhda aragti ahaan ka timaada iyo shilalka.

## 4.5 Qiimaynta iyo La socodka

**B. Qiimaynta**

Weydii ardayda su'aalahan oo kale

- Waa maxay hababka ay aadamigu u saameeyaam geyigooda (Deegaankooda)
- Waa kuwee waxyaalaha deegaanka ee faaiidada u leh jiritaanka aadmi?
- Sharax sida qaldan ee uu aadmigu u isticmaalo khayraadka dabuciga ah ee uu u saameeyo deegaanka?
- Sharax khayraadyada la cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin?
- Faahfaahi raadreebyada dhir-xaalufinta?
- Shararx wasakhaynta hawada faahfaahina saamayntooda aadmi?
- Tilmaan ka bixi ilaha ugu waawayn ee wasakhaynta hawada?

**T. La socodka**

- Ku bilow oo tilmaan ardayda inay fuliyaan Daraasado ay iyaga uuni iska leeyihiin oo ku saabsan carro waxyeelaynta dhir xaalufinta, wasakhda warshadaha i.w.m.
- Ka dooro kuwa ugu fiican siina noocyo abaal marineed ardayda qaarkood.

# 3.2 Waxyaabaha sababa Kululaanshaha Dunida iyo Saamayntooda

**Tirada xiisadaha: 4**

## 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Kadib markii u casharkani dhamaado ardaydu waa inay awoodaan:***

- *Garwaaqsiga sababta Aduunyo kululaansh aha keentay.*
- *Qiimeeyaan saamaynada aduunyo kululaansho ku hayso dadka, Dhirta dabiiciga iyo nolosha xayawaanka*

## 3. Tusmada

- Sababaha iyo saamaynada Aduunyo kululalaansho
- Dhimitaanka lakabka Osoonka
- Baraf-dhalaalka
- Roob-ay siidheedka
- Fatahaadda.

## 3. Araar

- Aduunyo kululaanshuhu waa dhibaato waayahan dunidan balaadhan haysata kaas oo si wayn u taabatay waxqabadkii aadmiga.
- Sababaha ugu waawayn ee dhaliya aduunyo kululaanshaha waxaa ka mid ah CFC, $CO_2$, CO.
- Gaasaskaan waa kuwa badanaa ay siidaayaan warshadaha, Talaajadaha, Warshadaha waawayn ee kulka gaadiidka, soo saarista Dhuxul dhagaxda, i.w.m.
- Saamaynta ugu dedega badan ee aduunyo kululaanshaha keentay waa daloolka ama dhimitaanka lakabka Osoonka ($O_3$) ku yimid. Lakabka Osoonka oo u adeega sida xijaabka ama gaas (neef) ka difaacda kulaylka aadaya Atmosfeerka diirimaadka dhulka oo uu si xad-dhaaf ah u hayay dhulku ayaa sababtay inuu dhalaalo barafkii cidhifyada dhulku iyo kulayl ku fida badwaynada sababa kulayl ku yimaada hawadii yarayd ee la filayay dhamaan qaybaha dunida oo dhan.

- Baruhu waa inuu ardayda u sameeyaa kooxo hawleedyo kana dooda sababaha iyo saamaynta aduunyo kululaansho ay ku hayaan dadka, Dhirta iyo xayawaanka
- Sii xog waran faahfaahsan oo ku saabsan Daraasada dhalaalka barafkii cidhifyada dhulka, heerka badda ee sare u kacay iyo mixnada cidhifyda ka muuqata
- Isla falanqeeya khataraha mustaqbalka ee la xiriira heerka badda ee kor u kacay hana magacaabeen meelihii ay asiibtay Sunaamidu iyo waxeeladii fatahaadu.
- Ka sii xogwaran faahfaahinta isbedelka Cimilada ee aan la saadaalin karin iyo koritaanka jawiga ama cimilo maalmeedka xumaaday ee sida: dabaylaha daran, duufaanada, fatahaadaha i.w.m kooxo-kooxo u kala qaybiFasalka una dir shaqo guri si ay u soo ururiyaan waribixino ku saabsan shilalka duufaanada , Sunaamida (tii ka dhacday Koonfurta iyo Kooufurta Bari Aasiya) Elnino (koonfurta Ameerika)

# 4. Hababka Baris-barashada

## 4.1 Soo jeedinta kaabayaasha dhigista iyo tixraacyada

- Khariidada Aduunka ee Cimilada iyo Dhirta
- Atlaska cusub (Addis Atlas)

## 4.2 Hababka cashar dhigista

- Sharaxaad (ciwaanka casharka si xogwaran leh)
- Koox-u-falanqayn
- Shaqo fasal (hawl-gal)
- Ardaydu waa inay iyagoo kooxo u falanqaynaya tilmaansadaan arimaha keena aduunyo kululaanshaha.
- U ogolow koox kasta inay taxaan sababaha dhaliya aduunyo kululaanshaha iyagoo tuse ku muujinaya oo ay ku jiraan saamayntooda isbedel cimilo, Heerka badda ee sare u kacaya, Dhalaalka Barafka iyo aafada cidhifyada dhulka ka muuqata

- U ogolow ardaydu inay warbixino ka soo ururiyaan ilaha kala duwan ee ku saabsan shilalkii dhacay sannadkii 2005 tii iyo cawaaqibkii ka dhashay Sunaamida.
- Goobahee bay ahaayeen meelihii ay Sunaamidu sida sare u saamaysay
- Goobahee bay saamaysay duufaanadu Tayfoon ee ka dhacay Dunida?
- Waa maxay sababta ay goobahani ay aafadani ugu soo noqnoqonayso Dunida inteeda kale
- U ogolow sidoo kale ardayda in ay soo ururiyaan warbixin ku saabsan Elnino?
- Maxaa looga jeedaa Elnino?
- Qaybtee bay dunida saamaysay Elnino?
- Falanqeeya sababta ay goobahani u saamaysay Elnino?
- Sii sidoo kale hawlgalo Fasal oo ay Daraasad ku samaynayaan qaybta Dunida ee ay sida xun u saamaysay Heerka Badda ee siyaaday?
- Waa kuwee magaalooyinka waawayn ee ugu baylahda badan (dayacan) ee uu barafka dhalaalay waxyeelada ku hayo iyo Heerka Badda ee sare u kacay?

## 4.3 Cashar diyaarinta ka hor

- Inta aadan gelin fasalka ka hor waa inaad heshaa khariirada cimilada Dunida
- Barnaamijiyo iyo ujeedada Daraasada

## 4.4 – Soo bandiga Casharka

**B. Hordhaca casharka**

Kadib dareen kicinta ardayda waad u bilaabi kartaa casharka adiga oo su'aalahan u soo bandhigaya sida kuwan soo socda:

- Kuma ayaa faahfahin karaya aduunyo kululaanshaha?
- Maxay kala yihiin saamaynada ugu waawayn ee Aduunyo kululaanshaha?

**T. Nuxurka cashirka**

- Ka sii xog waran faahfaahinta ku saabsan aduunyo kululaanshaha.

- Faahfaahi waxqabadka aadamigu saamaynada uu ku hayo deegaanka
- Isla falanqeeya saamaynta warshadaha ee u daran deegaanka
- Sharaxaada sababaha ugu waawayn ee Aduunyo kululaanshaha sida: CFC (kalorofoloro carbon) CO, $CO_2$, salfar, i.w.m.
- Isla falanqeeya sida ay gaasaskani u saameeyaan dhimaan lakabka Osoonka natiijooyinka ugu daran ee Aduunyo kululaanshaha.
- Mar kale islafalanqeeya natiijooyinka Aduunyo kululaanshaha sida Barafka Dhalaalay, Roob-aysiidheed iyo Fatahaada.
- Ku xiriiri Daraasadahan cadaymo natiijooyinka ugu daran ee Aduunyo kululaanshaha.

## 4.5 Qiimaynta iyo (La socodka)

**B. Qiimaynta**

Weydii su'aalahan soo socda oo kale:

- Sharax waxqabadyada aadmigu waxyaabaha ay u keenaan ee sababa Aduunyo kululaanshaha
- Waa maxay hababka dhimitaanka lakabka Osoonka ee keena Aduunyo kululaashaha?
- Xageebay gaasaska soo socda ka yimaadaan oo sii daayaa?
- Misayn, CFC, $CO_2$, Salfar dhaay Ogsaydh, CO
- Sidee bay roob-aysiidheedku ku samaysmaan?
- Sharax saamaynta Aduunyo kululaanshuhu ku hayo dadka, dhirta dabiciga iyo xayawaanka duurjoogta ah?

**T. La sdocodka**

- Ku bilow ardaydu inay isla falanqeeyaan saamaynta Aduunyo kululaansho, goobahooda ku xeeran?
- Ku bilow ardaydu inay fuliyaan Daraasadaha koox ahaaneed ee ku saabsan Aduunyo kululanshaha saamayntiisa.

# Jawaabaha Layliga Guud Ee Cutubka 3

## Qaybta I. Ka Jawaab su'aalaha

1. Shaqooyinka dhirta geyiga waxaa ka mid ah:-
   - Soo saarida cuntada
   - Hoy u noqoshada xayawaanada
   - Ilaalinta carrada nafaqada leh
   - Bilicda
2. Markii uu gaaskani la fal galo hawada inagu xeeran wuxuu uga sii gudbaa hawooyinka kale ee Gibilka kadibna wuxuu si toos ah u weeraraa Dahaadhka lakabka osoonka.
3. Arrimaha dhaliya kululaanshaha dunida waxaa ka mid ah:-
   - Qaaca ay siidaayaan warshadaha wax soo saara
   - Adeegsiga tamarta shidaalka
   - Wasakhawga hawada
   - Gaasaska qaarkood sida:- misayn kolooroflorik kaarboonik i.w.m
4. Ha isla falanqeeyaan ardaydu Baruhuna haku daba galo
5. Fadlan Ardaydu ha soo jeediyaan sidii looga hortegi lahaa daadadka, baruhuna haku dabagalo.
6. kheyraadyada la cusboonaysiin karo waxaa ka mid ah:
   - Dhirta
   - Xayawaanka
   - Hawada
   - Biyaha

Kheyraadyada aan dib loo cusboonaysiin Karin waxaa ka mid ah:-

Shidaalka (Batroolka, gaaska debiiciga ah, dhuxul dhagaxda i.w.m)

Macdanta biraha iyo walxahabir ma ahayaasha ah.

7. Jawaabta ardayda
8. Jawaabta ardayda

## Qaybta II. Tii run ah Run ku qor tii been ahna Been ku qor

1. Been
2. Run
3. Been
4. Run
5. Been

## Qaybta III. Buuxi meelaha Bannaan

1. Dhul beereedyadu
2. Kheyraadyada la cusboonaysiin karo iyo kheyraadyada aanla cusboonaysiin Karin
3. Walxaha
4. Kolooro filooro kaarboon (CFC)
5. Ogsajiin($O_2$)

## Qaybta IV. Isku Aadi

1. J
2. X
3. D
4. T
5. B

CUTUBKA 4

# ARIMAHA DADWAYNAHA

## 4.1 Arimaha la xidhiidha Dadwaynaha

**Ciwaanka 4.1.1 Kaalinta dhalinyarada ee la dagaalanka HIV/AIDS ka**

**Tirada xiisadaha: 9**

### 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan Cashar dhigida

***Marka uu casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:***

- *Horumariyaan xirfadaha nololeed kaas oo awood u siinaya la dagaalanka HIV/AIDS*
- *Fahmaan hawlaha lagu daryeelayo kuwa la nool HIV/AIDS iyo qoysaskoodaba*

### 2. Tusmada

- Kaalinta ay dhalinyaradu ka qaataan la dagaalanka cudurka HIV/AIDSka

### 3. Araar

Dhalinyaradu waa da’da dadka ugu firfircoon, dadka intiisa badan ay u arkaan kooxdani inay tahay kuwa uu sida sare u saameeyay HIV/AIDS ku. Sababta oo ah aqoonsigooda bulsho waxay noqdeen kuwo habaysan oo buuxin kara himilooyinka, waxaana la aaminsan yahay inay dhalinyaradu door wayn ka cayaari karaan la dagaalanak HIV/AIDS. Waxaa la aaminsan yahay inay dhalintu bulshada bari karaan is habaynta falanqaynta sawaxanada iyo naadiyo isugu xiran heer Dugsi iyo heer Qabalee (Xaafadeed) labadaba. Ma aha oo keliya mid horumarin karta xirfadaha nololeed ee nidaamka Ballan qaadkooda

xirfadahaan nololeed waxaa ka mid ah: dhawrsananta, iska caabinta dibjirnimada. Daryeel siinta iyo taageerida dadka la nool HIV/AIDS iyo ka fikirka mustaqbalka. Baruhu waa inuu qaadaa talaabo hogaamineed iyo hagitaan doorka wixii ka baxsan oo uu u habeeyo dhalinyarada laftigeeda la socod iyo kormeero badan waxay lagama marmaan ka dhigaysaa tan iyo ilaa inta ay dhalintu la qabsanayaan waxqabadka dhankooda khuseeya.

## 4 Hababka Baris - barasho

### 4.1 Soo jeedinta kaabayaasha dhigista iyo Tixraacyada

- Qoraal
- Wararka warbaahinta
- Buug gaar ah oo looga hadlo ariimaha khaaska ah
- Ku martiqaadida khabiir caafimaad iyo xoghayaha xafiiska laanta HIV/AIDS

### 4.2 Hababka waxa dhugista

- Kedis
- Soo bandhigida su'aalo adag
- falanqayn
- Soo koobid

### 4.3 Cashir diyaarinta ka hor

- Soo ururso agab badan oo laxiriira
- Dejinta habka dhigista ugu haboon

### 4.4 Soo Bandhiga Casharka

**B. Hordhaca casharka**

Kicinta dareenka ardayda kadib u adeegso su'aalo kedis ah kadibna isla falanqaeya.

**T. Nuxurka casharka**

Adiga oo u adeegsanaya khariirad maskaxeed aad ku sawirtay khariirad goobeed, kuna qoraya waxa ay ardaydu falanqeeyeen isuguna habaynaya oo gelinaya diiwaan




Baruhu wuxuu u adeegsan karaa khariirad goobeedka ciwaano kala duwan. Isaga oo awood u yeelan doona inuu habkan u xisaabiyo sidii ay ardayda lafahaantoodu ugu dabakhi karaan hawlgaladooda barasho ee maalin ila maalin ah.

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

**B. Qiimaynta**

- Weydii su'aalo
- Kormeerida hawlaha ay ku guulaystay bulshadu
- Soo ururinta warbixinada

**T. La socodka**

- Fulinta heerka hawlgalada
- Diiwaangelinta heerarka
- Xaqiijinta haday ujeedadii gaarka ahayd tahay mid lagu guulaystay iyo inkale

## 4.1.2 Istiraatijiyadaha lagu yaraynayo Taranka dadka ee dhaqsaha ah ee Itoobiya

**Tirada xiisadaha: 5**

## 1. Ujeeddada gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Marka uu cashirkani dhamaado kadib ardydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Garwaaqsadaan isbedelka jahaysnaanta koritaanka dadka Itoobiya*
- *Tilmaansadaan istiraatijiyadaha loo dejiyay in lagu dhimo koriinka dhaqsa ah ee dadka.*
- *Ka guul gaaraan ahmiyada laga leeyahay siyaasada dadka iyo yarayнта saboolnimada ee Istiraatijiyadaha Itoobiya*

## 2. Tusmada

- Isbedelka-jahaysnaanta koriinka dadka Itoobiya
- Istiraatijiyadaha lidka koriinka dhaqsaha dadka
- Kaalinta ay dhalinyaradu ka qaadanayso ka guulaysiga siyaasada dadwayne iyo yaraynta saboolnimada ee Istiraatijiyadaha Itoobiya

## 3. Araar

Isbedelka jahaysnaanta tirada dadka ee kordhaysa ee Itoobiya waa mid muujinaysa inay soo bilaabantay 1900-2007. Isbedelka jahaysnantu wuxuu ku tusayaa sida dhaqsaha badan ee uu u korayo isbedelka jihaysaantu gaar ahaan intii ka dambaysay 1950 meeyadii. Baruhu wuxuu waydiin karaa sababo haddii ardaydu ay karaan arimo ka badan sida fiditaanka daryeelka caafimaad, koritaanka fursadaha shaqo i.w.m.

Iyada oo casharkan lagu xiriirinayo fasalkii todobaad (7$^{aad}$) waa inay ardaydu dib ah u jaleecaan fikradaha aasaasiga ah.

Raad reebyada koritaanka tirada dadka waa in la isla falanqeeyo loogana sii gudbo istiraatijiyada loo dejiyay (qorsheeyay) lidka koritaanka dadka iyo waxyaabaha la xiriira sida saboolnimada. Baruhu wuxuu siin karaa ardayda sharaxaad ka badan oo ah Istiraatijiyadaha kala duwan ee uu siinayo hadii ay suuro gal tahay dagaankiisa tusaale Naadiyada, ururada bulshada, kooxaha habaysan ee ka qayb qaata waxsoosaarka heerarka yaryar lagu halbeego.

## 4. Hababka baris-barashada

### 4.1 kaabayaasho Dhigista iyo tixraacyada

- Buug yar oo odhaahyo iyo sawiro leh
- Tiro koobka dawlada dhexe ama dawlad goboleedka (Deegaameedka)
- Xafiisyada heerka hoose iyo wax-soo saarka farshaxanka

### 4.2 – Hababka cashar-dhigista

- Kedisyo
- Qorshe su'aalo xoogan oo ay ardaydu ka jawaabaan sida: waaa maxay sababta keenta koriinka tirada dadka iyo saboolnimada sidee baad u xalin kartaan dhibaatadan?
- Faahfaahin iyo islafalanqayn

### 4.3 Cashar diyaarinta kahor

- Diyaarso xiisada ka hor agabka aad u baahan tahay
- Qorshayso hababka ugu haboon ee cashar dhigista

### 4.4 Soo bandhigida cashirka

**B. Hordhaca casharka**

- Ku kici dareenka ardayda naqatiinka casharkii fasalka 7$^{aad}$ eek an lamid ka ahaa
- fursad u sii ardayda xaga hore fadhida warbixinta ay mudnaanta siinayaan

**T. Nuxurka Casharka**

- hordhaca kadib cashar hoosaadyada waa in loo adeegsado xogaha iyo tixraacyada diyaarka ah (la heli karo)

- xogta aisbedelka jahaysnaanta koritaaaanka tirada dadka
- ururada kala duwan ee dagaanka taas oo loo adeegsan karo dhalinyaradu si ay ugu najaxaan himilada
- aqoonsii hayadaha bixiya daymaha ee wax soo saarada heer ka hoose
- aqoonsii (tilmaan) tirada iyo noocyada ururada waxsoosaarada heerka hoose ee goobahaas

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

**B. Qiimaynta**

- u dir koox hawleed
- warbixino la soo uruiryay

**T. La socodka**

- Tilmaan koox-hawleedka oo kormeer
- Darajooyin ku sii shaqooyinka
- Diiwaan geli darajooyin
- Faallo kabixi hawlaha
- Tilmaan dhinacooda adag iyo jilicsan

# 4.2 Xuquuqaha Aadamiga Iyo Badbaadadiisa

## 4.2.1 Ujeeddada Gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Marka uu casharkani dhamaado kadib, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-***

- *Faahfaahiyaan macnaha xuquuqaha*
- *Aqoonsadaan qodobadii uu ka koobnaa shir-waynihii qaramada midoobay eek u saabsanaa xuquuqaha carwurta.*
- *Sharaxaan xad-gudubyada xuquuqaha caruurta ee ka dhaca dagaamadooda.*
- *Faahfaahiyaan iskana difaacaan xadgudubyada xuquuqda caruurta.*
- *Tusaalayaal ka bixiyaan cadeeyaama sababaha dhaliya maamul suuban la’aanta ka jirta Afrika.*
- *Ka qoraan warbixin kooban oo tusaaleyaal leh oo ku saabsan maamulka sweban iyo maamulka xun ee kajira goobahooda, labadaba.*

## 4.2.2 Tusmooyinka

- Macnaha xuquuqaha
- Arrimaha (qodobada) xuquuqaha
- Ladagaalanka xadgudubyada
- Xuquuqaha qoomiyadaha, quruumaha iyo shucuubta Itoobiya.
- Nuxurka xuquuqaha Aadmi iyo dimoqraadiyadeed.
- Maamul suuban la'aanta Afrika.

## 4.2.3 Araar

Xuquuqdu waa aasaaska ama salka wanaagsanaanta ama fiicnaanshaha u ah Binu-aadamka. Tani waa ta dhalisay inuuna Aadmigu noolaan ama jiri karin bulsho iyo sharci xuquuqdiisa difaacda (ilaalisa) mooyaane. Waxay shaqsiyaad ku andacoodaan oo ay aaminsan yihiin bulshada iyo dawladu inay ilaaliyaan.

Xuquuquhu waa kuwo sida caadiga ah sare u qaadaya bulshada oo ka kooban xuquuqda Aadmiga iyo Dimoqraadiyadeed; xuquuqda caruurta, xuquqda Haweenka, xuquuqaha qoomiyadaha iy quruumaha iyo kuwa ay wax u dhiman yihiin (laxaadka la'). Xuquuqahaasi waa kuwa ugu horaynba ay damaanad (kafaallo) qaadayaan xeerarka heer caalami ama heer qaran sida: xuquuqda Aadmiga oo ay qaramada midoobay ku dhawaaqday.

Mawqifka dalkeenan Itoobiya ee ku aadan xuquuqda caruurta waa mid ay ku xaqiijisay Dastuurka jamhuuriyada Dimoqraadiga Federalka Itoobiya qodobkiisa 36$^{aad}$, xuquuqaha haweenka iyo Aaya ka talinta ilaa heer gu'itaan ee ku xusan qodobada 35$^{aad}$ iy 39$^{aad}$ sida ay isugu xigaan.

Barrow! Waxaa lagula talinayaa inaad maamulka fasalka ku salaysid awooda ardayda. Cashirkana waxaad ku tayayn kartaa adiga oo u sii marinaya islafalan qayn una ogolaanaya inay ardaydu fasalka dhexdiisa kaga doodaan inaan loo baahnayn adeegsiga xeerarkii (qawaaniintii) keli talisnimo ee ku faafay qaarada Afrika. Laakiin haatan Afrika waxay gudogashay waayo cusub oo qaab-bedel ah. Qaab-badalkaas oo ay ku sameeyeen nidaamkii keli talisnimada ugana sii gudbeen Dimoqraadiyada.

## 4.2.4 Hababka Baris-barasho

**B. Kaabayaasha cashare dhigista**

- Dastuurka JDFI.
- Khariidad muujinaysa gobolada (kililada) (qayb-qaybinada siyaasadeed) ee JDFI.
- Khariidad muujinaysa qaybqaybinada maamul ee Imbiraadooriyadii Itoobiya iyo Jamhuuriyada Dimoqraadiga shucuubta Itoobiya.

**T. Hababka Dhigista**

- Isla-falan qayn
- Dooditaan
- Ku muujinta maqal iyo muuqaal

**J. Cashar diyaarinta ka hor**

Adeegso Dastuurka JDFI oo ah isha aasaasiga ama gundhiga kuu noqon kara

- Soo bandhig casharka adiga oo adeegsanaya khariidadaha Imbiraadooriyadihii, JDSHI iyo JDFI ee Itoobiya
- Iskuday inaad hesho dastuuradii lmbiraadooriyadihii Itoobiya JDSHI iyo JDFI.
- Ardayda u habee koox-koox.

**X. Soo Bandhiga Casharka**

**B. Hordhaca casharka**

kicinta dareenka (shucuurta) ardayda u adeegso suaalo kedis ah.

Ku amar inay ka jawaabaan su'aalahan soo socda.

- Maxaad ka taqaanaa xuquuq?
- Tax ama qor dhamaan xuquuqaha uu Dastuurka JDFI xaqiijiyay?
- Maxay kala yihiin xuquuqaha gaarka u ah Aadminimada?
- Miyey kula tahay inay xuquuquhu xadaysan yihiin.

## T. Nuxurka casharka

- Qeexida ereyga xuquuq
- Falanqaynta qodobada sare u qaadaya xuquuqaha koox ama shaqsiyeed.
- Faahfaahinta qodobada Dastuurka JDFI ee difaacaya xuquuqaha caruurta, Haweenka Aadamiga iyo Dimoqraadiyadaba.
- U muujiso xiriirka ka dhexeeya JDFI Dastuurkeeda iyo Diiwaanada (Dhokomantiyada) xuquuqda aadmiga ee heer gobol iyo heer caalamiba

## Kh. Soo koobida casharka

Waa inaad adkaysaa qodobadan soo socda:-

- Xuquuqdu waa andacoodka (dacwoodka) shaqsiyaal.
- Waa in la gaadho aqoonsi bulsho
- Waa in la helo aqoonsiga sharci ee ugu fiican

Xuquuqi waa aasaasi maxaa wacay

- ➢ Waa damaanad qaadka in la ahaado Aadami
- ➢ Waxay dhamaystirtaa xuquuqda dimoqraadiyadeed.

Sidaa darteed xuquuqda Aadamiga khaas ahaaneed waa mid aan qaybsami Karin, aan Ajnabi (shisheeye) ku xidhnayn oo caalami ah.

Xuquuqda aasaasiga ahi waa ta go’aamisa ku wanaagsanaanteena sida:-

- ➢ Xuquuqda in la noolaado (la ahaado ama lagu sugnaado nolol)
- ➢ Xuquuqda xoriyada (xor-ahaano)
- ➢ Xuquuqda in hanta la yeesho

## 4.2.5 Qiimaynta iyo la socodka

### B. Qiimaynta

suaalahan oo kale weydii:-

- Waa maxay xiriirka ka dhexeeya xuquuqda iyo waajibaadka?
- Waa maxay natiijada ka dhalata baahida dadka ee bartilmaansiga (shiishka saarida) xuquuqaha oo keliya?

- Waa maxay natiijada ka dhalata marka ay dawlada ama xukuumada oo keliya ay waajibaadyada saran dadka ay ku qasabto iyada oo aan xushmaynin xuquuqdooda?

**T. La Socodka**

- Ku amar sii ardayda inay ka tixraacaan Dastuurka JDFI isna barbardhig kala duwi ku sameeyaan xuquuq Aadami iyo xuquuqda Dimoqraadiyadeed
- U dir arday inay war bixun ka soo qoraan xadgudubka xuquuqda caruurta ee lagaga dhaqmo deegaankooda hana ka talo bixiyaan sidii loola dagaalami lahaa.

# 4.3 Barnaamijyada Iskaashiga

**Tirade xiisadaha loo qoondeeyay: 4**

## 4.3.1 Ujeedada Gaarka ah ee ugu yaraan cashar dhigista

***Casharkani marka uu dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Magacaabaan urur Goboleedyada Afrikaanka ah.*
- *Aqoonsadaan xubnaha ka tirsan ururadaas*
- *Garwaaqsadaan bartilmaameedyada urur goboleedyada Afrika*
- *Isla falanqeeyaan samayskii ururka midowga Afrika (OAU) iyo isu bedelkaiisii ururka midnimada Afrika (AU)*

## 4.3.2 Tusmooyinka

- Urur goboleedyada ugu w/wayn
- Helitaankii (OAU) iyo isu-bedelkiisii (AU)
- Hadafyada (yoolasha) ururada ugu waawayn

## 4.3.3 Araar

Waxaa jira laba nooc oo ururo ah ururo caalamiyeed iyo kuwo goboleedba. Ururada caalami waxaa sameeya laba dal iyo in ka badan oo xor ah.

Waxayna kaga duwan yihiin urur goboleedyada waxay leeyihiin ujeeddo guud.

Urur goboleedyadu waxay leeyihiin ujeeddo xaddaysan oo ka jawaabaysa xaalada u gaarka ah gobolkooda.

Ururada gobol-ahaaneed waxaa sameeya xubnaha ka tirsan gobolka.

Urur goboleed iyo urur caalami labadaba waxaa jira ujeeddooyin guud oo ay leeyihiin waxaana ka mid ah:-

- In la adkeeyo (xoojiyo) Nabada iyo Amniga Dunida.
- Hagaajinta xidhiidhada saaxiibtinimo ee waddamada dhexdooda.
- In lagu guulaysto (najaxo) iskaashi caalami ah
- Xalinta mashaakilaadka dhaqaale, bulsho, dhaqan ama dabeecada Aadminimo.

## 4.3.4 Hababka Baris-Barasho

**B. Kaabayaasha cashar dhigista**

- Axdiga UN, OAU iyo AU
- Qoraalada urur goboleedyada sida: COMESA, ECOWAS, SADC AU, ururka u-ololeeya Biyaha webiga Niil

**T. Hababka Cashar dhigista**

- Isla falanqayn
- Muujinta maqal and muuqaal
- U calaamadin (halka ay dhacaan) wadamada Afrikada Galbeed, B/Afrika khariidada dusheedb.

**J. Cashar diyaarinta ka hor**

- U habayso tixraacyadaada gaar ahaan kuwa khuseeya aasaaskii iyo ujeedooyinka ururada gobol iyo caalami ahaaneed.
- Raadi Atlaska taariikh ahaaneed kaas oo si wayn looga tixraaci karo halka ay dhacaan urur goboleedyada qaarkood
- U habee ardayda lammaane iyo kooxba.

**X. Soo Bandhiga Cashirka**

**B. Hordhaca Casharka**

Waydii ardayda inay tilmaamaan halka ay dhacaan xarumaha fadhiyada u ah urur goboleedyadan soo socda ee khariirada dusheeda wakhti xaadirkan:

Qaramada midoobay, midnimada Afrika, COMESA, SADC, IGAD ururka ismaamulada Ameerika Beesha Dhaqaala Reer yurub iyo Jaamacada carabta.

**T. Nuxurka casharka**

- Cadaynta ujeeddooyinka aasaa siga ah ee ururada aynu sare ku soo xusnay (magacawnay)
- Isla falanqaynta ururada dhinacooda adag iyo dhinacooda jilicsan
- Islafalan qaynta baahidii keentay isubedelkii uu OAU isu bed elay AU
- Isla falanqaynta kaalinta Golaha Amniga ee Qaramada Midoobay uu u doonayo wakhtigan xaadirka ah dib-u-habaynta.

**J. Soo koobida Casharka**

Xusuusin ahaan u sii kuwan soo socda:

Ururada caalamiga ahi waxay leeyihiin ujeeddooyin guud, laakiin urur-goboleedyadu waxay leeyihiin ujeeddooyin xadaysan. Ururo-goboleedyadn waxay leeyihiin ujeedooyin kala duwan. Waxaana kamid ah dooyin milatari, Dhaqaale ama siyaasadeed midkood. Tusaale ahaan NATO wuxuu Leeyahay ujeeddooyin milatari Beesha Dhaqaalaha Reer yurub waxay leeyihiin ujeeddooyin dhaqaale. Ururka Midnimada Afrika wuxuu leeyahay ujeeddooyin Dhaqaale iyo siyaasadeed labadaba. ECOWAS wuxuu leeyahay ujeeddooyin dhaqaale.

## 4.3.5 Qiimaynta iyo La socodka

**B. Qiimaynta**

ku dhiiri geli ardayda in ay isla falanqeeya kuwan soo socda

- Aqoonsiga xubnaha katirsan ururka Qaramada Midoobay iyo sinaanshahooda, hab-dhaqan iyo aragtiba
- Golaha Amaanka iyo Awoodiisa diidmada qayaxan
- Awooda kala baahsan ee ka dhaxaysa Golaha loo dhan yahay iyo Golaha Amaanka
- Sababta ugu wacan Gudigii Amaanada laga hakiyo hawlihiisii haatan ee ay Qaramada Midoobay dan mooday.

**T. La socodka**

- U dir ardayda inay isbarbardhigaa Golaha Amaanka iyo Golaha guud.
- Weydii ardaydu inay taxaan ama qoraan dhinacyadii adkaa iyo dhinacyadiisii jilicsanaa OAU.

Weydii inay soo jeediyaan war bixin ku saabsan waxyaabihii ugu waawaynaa ee ay ku soo kordhiyeen gobolka ururka ECOWAS

# 4.4 Caalamiyaynta

**Tirada xiisadaha: 2**

## 1. Ujeedada gaarka ah ee ugu yaraan la filayo

***Cashirkani marka uu dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:***

- *Garwaaqsadaan edegaynta ama caalamiyaynta*
- *Tilmaansadaan fursadaha iyo isbedelada edegaynta ee khuseeya ganacsiga, macluumaadka iyo (mihnadaha) xirfadaha*

## 2. Tusmada

- Fikradaha edegaynta
- Isbadalada edegaynta ee khuseeya ganacsiga, macluumaadka iyo dhaqanka

## 3. Araar

In kastoo edegayntu ama caalmiyayntu ay u muuqato mid la xidhiidha fikradaha barahuna waa inuu isku dayaa inuu u sharaxo xididadooda taariikheed ee aasaaska u ahaa.

- Horumarkii hantigoosadkii aan cidina kula tartami karin xaga ganacsiga i.w.m.
- Horumarkii Tignooloojiga warbixineed (macluumaad)
- Aasaaskii (samayskii) ururada dhaqaale qaaradeed sida EEC (Gudiga dhaqaalaha yurub) NAFTA ururka Ganacsiga xorta ah ee waqooyiga Ameerika i.w.m.

Isla wakhtigii aad baranayseen ee aad u hesheen fursadaha (dhinacyada wanaagsan) iyo isbedelada (dhunacyada xun) ee edegaynta aad isla falanqayseen waxaad si gaar ah u jaleecdeen waddamada horumaray ee gaar ahaan kuwa ay khusayso ganacsiga iyo dhaqan ka sida:

- Lumitaanka qiimayaasha qaran
- Xoog ku qabsiga dhaqamada qalaad (Hanaanka, danaha i.w.m )
- Lumitaanka dawladnimo maxaa yeelay madaxbannaamida heerka sare ah

## 4. Hababka baris-barashada

### 4.1 Kaabayaasha cashar dhigista

- Qoraal
- Wargeysyo
- Wararka

### 4.2 Hababka Cashar dhigista

- Kedisyo
- Koritaanka fursadaha oo aad loo falanqeeyo
- Faahfaahin
- Cashar naqtiimid

### 4.3 Cashir-diyaarinta ka hor

- Soo ururinta warbixinada
- soo ururinta macluumaad habaysan

### 4.4 Soo Bandhigida Casharka

- cashar dhigistu waa inay ku bilaabantaa hawlgal kedis ah (u ogolaada ardaydu inay wax ka dhahaan cinwaanka wax ku saabsan) kadibna loo qorsheeyo suaalo xoogan
- waa maxay sababta ay taas ku dhacday?
- maxaa lagu sababayn karaa?
- barashada casharka waa in la faahfaahiyaa
- barahana waxaa waajib ku ah inuu ardayda nabdaadiyo
- in loo isticmaalo qoraal iyo hadii ay ku haboon tahay agabka dheeraadka

## 4.5 Qiimaynta iyo la socodka

**B. Qiimaynta**

- sii shaqo guri iyo shaqooyin Fasal
- u habee kooxo islafalanqeeya iyo hadii ay suuro gal tahay caynadaha dooda
- sii kedis

**T. La socodka**

- baruhu waa inuu diiwaan geliyaa waxqabad kasta oo uu u diro ardada natiijadooda
- u dir islafalanqayno ku salaysan daraasado

# Jawaabaha Layliga Guud ee Cutubka 4

## I ku qor tii Run ah Run tii Been ahna Been

1. Been 2. Been 3. Been 4. Been

## II. Ka dooro

| | | | |
|---|---|---|---|
| 1. | J | 4. | X |
| 2. | B | 5. | X |
| 3. | X | 6. | X |

## III. Dhameystir Weedhahan

1. Shiinaha iyo Hindiya
2. In la noolaado iyo xoriyada
3. 1956 ku
4. Korodhka tirada dadka
5. 650 ilaa 1250

## IV. Ka Jawaab Su'aalaha

1. Maadaama ay yihiin kuwa ugu nugul halista cudurkan HIV/AIDS isla markaana ku jira marxalada ugu kulul ee uu dadku soo maro
2. In la noolaado iyo xoriyada
3. Tuugada iyo ka ganacsiga jidhka
4. Lumitaanka dhaqamada iyo go'aanka arimaha caalamiga ah

**Cutubka 1aad: Dunida faan ku noolnahay Waa=>25 xisaadood**

**Muqararka fasalka 8aad ee Cilmiga Bulshada**

**Maxsuulka Cutubka: Ardaydu Waxay Awoodi Doodaan;**

- Inay tilmaamaan goobaha ay dhacaan qaaradaha, muuqaaladooda waa weyn, iyo luqadaha muhiimka ah ee adduunka. Inay fahmaan qeybo ka mid ah ilbaxnimooyinkii hore ee adduunka. Inay kala gartaan goobaha adduunka ee dadku xoonsanyahay iyo meelaha dadka Addunka uu teelteel ku yahay iyo inay aqoon sadaan qodobada ma'suulka ka ah kala duwanaan shahooda. Inay tilmaamaan saameynta uu lahaa kacaankii warshadaha .
- Inay aqoonsadaan taaiikhdii halgamadii dadka Afrika ay kaga soo horjeedeen gumesytayaashii. Inay tilmaamaan fikradiyhii cusbaa ee soo baxay iyo inay sharax ka soo bixiyaan waxay ahaayeen.

| Kartida | Tusmayaasha | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan ;<br>▪ Inay qoraan khariidada todobada qaaradood.<br>▪ Inay tilmaamaan xidhiidhka goobeed ee qaaradaha.<br>▪ Inay isbarbar dhigaan iyo inay farqiga baaxadda qaaradaha adduunka.<br>▪ Inay kala soocaan figaha ugu sarreeya iyo kuwa ugu hooseeya taagaya adduunka.<br>▪ Inay aqoonsadaan luqadaha waa weyn ee adduunka lagaga hadlo .<br>▪ Inay ku muujiyaan isticmaalka khariidada, tusaysa meelaha lagaga hadlo luqadaha waa weyn ee adduunka . | 1. Adduunka aan ku nool nahay.<br>1.1. Qaaradaha (xidhiidhka goobeed iyo baaxadeed ee qaaradaha) Waa=> 3, xiso.<br>▪ Muuqaalada waa weyn ee qaaradaha.<br>▪ Muuqaalada dhulka waa weyn; fiktar ugu sareysa ee qaaradaha; Sida; buurta EVEREST, Mont Blane, iyo taga ugu hooseeeya sida; badda dhimatay.<br>▪ Wabiyada waa weyn iyo harooyinka<br>1.2. Dadka Adduunka.Waa=> 6, xisadood.<br>▪ Luqadaha waa weyn ee Adduunka .<br>▪ Ilbaxnimooyinkii hore sida; Giriiga, Roomaankii, Shinihii, | ▪ Waxaad sawirtaa khariidada adduunka sabuurada dusheeda iyo ado muujinaya meesha ay dhacaan qaaradaha kujwaas oo lagu soo bartay sanadkii hore.<br>▪ Ardayda wey qori karaan middan ama waxaad siin kartaan ardayda meelo bannaan ooy buuxinayaan. Hadana waxaad tustaa khariidad daabacan oo adduunka ah iyo in aad weydiiso ardayda inay isbarbar dhigaan farqiga baaxadda qaaradaha oo ku saleeyaan khariidadan. |

| | | |
|---|---|---|
| ▪ Inay tilmaamaan guulihii ugu waa weynaa ee ay gaadheen ilbaxnimooyinkii hore.<br>▪ Inay fahmaan filiqsanaanta ama inay qeyb ka tahay ilbaxnimada jirta maan adduunkii hore..<br>▪ Inay aqoonsadaan qeybo ka mid ah meelaha dadka adduunku ku badan yahay iyo meelaha ay ku yar yihiin .=> Inay fahmaan in wadaninimada iyo gumeysigu ay yihiin midka mid ah raadkii isbedelkii warshedeynta.<br>▪ Inay aqoonsadaan meeshii ay ku bilaabantay kacaankii warshadaha .<br>▪ Inay fahmaan wax iska caabintii Afrika ee gumaysiga kaga hortageen.<br>▪ Inay aqoonsadaan natiijooyinka ka soo baxay labadii dagaal ee adduunka ama caalamiga ahaa..<br>▪ | Beershiyaankii, Inkaaskii.<br>1.3. Hab nololeedka dadka iyo baahsanidiisa.<br>1.3.1. Teelteelka dadka ama goobaha dadku ku yar yahay sida; kuleylka iyo qabawga lamadagaanada, marka loo eego dadweynaha Hindiya, Shiinaha iyo Afrika. Waa=> 3, xisadood.<br>1.3.2. Wax dhaliya baahsanaanta kaladuwan ee bulshada Waa=> 3, xiso .<br>▪ Qodobada duleed , sida; cimilada, khayraadka ,iyo qaababka dhulka.<br>▪ Qodobo bulsheed ( siyaasadda, dhaqaalaha iyo isgaadhsiinta).<br>1.3.3. Hab nololeedka qeybo kala duwan ee adduunka Waa=> 1, xiso .<br>1.3.4. Kacaanadii warshadaha iyo saameyntoodi Waa=> 8, xiso.<br>▪ Bilawgii isbedelkii warshadaynta.<br>▪ Saameynta isbedelkii warshadeynta sida; wadaniyadda, gumeysiga, mgaaaleynta i.w.m<br>▪ Soo bixidii fikirka cusub sida; gobanimadoonka, dimuqraadiyada, axsaabta..<br>▪ Dagaaladii adduunka 1aad iyo 2aad .<br>▪ Faafiddii gumeysi diidka reer Afrika sida; Ashante; samori joure Maji-Maji-kukuyu Ethiopia ( Adwa).<br>▪ Halgankii lagaga horjeeday | ▪ Marka xiga weydii ardayda inay sheegaan aqoosniga wabiyada iyo harooyinka waa weyn ama jasiiradaha kadibna, waa inay ku daraan khariidadooda.<br>▪ Layliga kadhig; Qoys ku nool meel u dhaw buurta Everst (Buur yaqaan).=> Cashir barashada ku soo qaad ( Dal xiis lagu tagay badda dhimatay) .<br>▪ Ka dood iyo barbardhig farqiyada u dhexeeya ardayda.<br>▪ Ka dooda luuqadaha ugu waa weyn ee Adduunka.Sida; Mandarin, English, Spanish, Arabic i.w.m. Weydii ardayda inay aqoonsadaan wadamada meelaha laga hadlo luqadda marka hore khariidad.Kadib, dood ka samee sababta ay luqada ingiriiiska ay u noqotay mid ku faaftay adduunka.<br>▪ Cashirka ku soo qaado Wiil kixuuyo ah oo ku hadla luqada kikuuyada, Englishka, iyo sawaaxiliga. Caddee goobaha qaaradda Afrika |

| | | |
|---|---|---|
| | xukumadii gumeysiga. Neodaster Wafd ANC | lagaga hadlo sawaaxiliga. => Hordhac u samee laba ilbaxnimo oo hore ado maraya cashir barasho wax baadhis ah. ROomaankii hore iyo shiinaha, ka calaamadi meesha ay dhacaan khariidada aduunka. Sharax ka bixi wixii ku saabsan ilbaxnimadoodii, sida; inkas, beershiya, girii iyo inaad weydiiso ardayda inay maabka ka helaan haddii ay karaan.<br>▪ Weydii ardayda wixii ugu waa weynaa ee guulo ah ee kasoo baxay cashir barashada wax lagu baadhayay.<br>▪ Waxaad sheegtaa ganacsigii u horreeyay ee ka dhexeeyay bariga Afrika iyo shiinaha iyo jilayadii laga helay xeebta kiinya ee lagu sameeyay dalka shiinaha muddo hore.<br>▪ Waxaad tustaa ardayda khariidada adduunka oo muujinaysa filiqsanaanta dadweynaha adduunka.=> Ka dooda adiga iyo ardayda kadibna, weydii ardayda |

| | | |
|---|---|---|
| | | waxay filayaan inay sabab u tahay in goobina dadku ku yaraado, meel kalena, dadku uu aad ugu farabato. => Weydii ardayda qodobada duleed eey filayaan inay saameyn ku leyeihiin baahsanida dadweynaha adduunka.Ku qor sabbuuradda dusheeda qodobada sababta u ah filiqsanida.<br>▪ Marka xigana ku soo qaado habka baris/barashada cashirka qoysaska ku nool Aretic -ga ee loo yaqaano " Inuit' iyo bulshada ku baahsan dhulka qabaw ee lama dagaanka ah.<br>▪ Sidoo kale, ka dooda, qodobada saameeya filiqsanida dadka ee ay ka mid yihiin; Duleedka, bulsheedka iyo dhaqaalaha oo ah dhamaantood qodobo keena kala duwaanaanta baahsanaanta bulshada adduunka, liis gareena.=> Sidoo kale ku eeg habka baris/barashada cashirka dadka ku nool hareerta moombey, Hindiya |

| | | |
|---|---|---|
| | | iyo khariidada filiqsanida dadweynahaas.<br>▪ Ugu dambeyna, waxaa isbarbar dhigtaa laba xaaladood, go'aankana ku qor sabuuradda.<br>▪ Waxaad sharaxdaa sida kacaankii warshaduhu u billawday.<br>▪ Weydii ardayda inay ka doodaan sababaha iyo inaad weydiiso ardayda haddii ay u maleyn karaan in dagaalada inay ku bilaabemeen sababo lamid ah kuwii hore.<br>▪ Weydii ardayda waxyaabaha wanaagga ah ee kasoo baxay labadii dagaal ee adduun weynaha ka dhacay. |

## Qiimeynta:

**1**. Baruhu waa inuu qiimeyn joogto ah ku sameeyo shaqada ardayda inta uu socdo cutubkan waana inuu ibarbar dhigo sharaxa socda, isagoo ku saleynayo kartida, si uu go'aan uga gaadho inay gaadheen heerki waxbarasho ee looga baahnaa iyo in kale

## 2. Ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa:

Waxay awoodi doonaan : Inay koobiyeeyaan todobada qaaradood khariidadahooda, inay tilmaamaan xidhiidhka dhul ahaan ee ka dhexeeya; Inay isbarbar dhigaan baaxadahooda qaaradaha adduunka, inay kala saaraan taagagga adduunka meelaha ugu hooseya; inay aqoonsadaan wabiyada iyo

harooyinka adduunka, inay aqoonsadaan luuqadaha muhiimka ah ee lagaga hadlo adduunka; inay tusaan adeegsiga khariidada meelaha lagaga hadlo luuqadaha muhiimka ah ee adduunka; Inay tilmaamaan guulaha ay gaadheen ilbaxnimooyinkii hore ee adduunka; inay fahmaan sida ay ugu filqsann yihiin ilbaxnimooyinkii hore dunida manta; Inay tilmaamaan goobaha adduunka ee dadku ku yar yahay ama ku bada n yahay , inay soo koobaan qodobada keena kala duwanaanta filiqsanaanta dadweynaha adduunka, inay fahmaan wadaniyadda iyo gumeysiga inuu saameyn ku lahaa kacaankii warshadaha ; inay aqoonsadaan natiijooyinkii dagaaladii adduunka. Inay laxidhiidhiyaan fikradihii cusbaa ee ka soo baxay kacaankii warshadaha.

## 3. Ardayda ka sarreysa Heerkii Looga Baahnaa;

Ardayda heerka sare ka gaadhay dhanka shaqadooda waa in lagu qiimeeyo, loona aqoonsado himilada fiican ee ay ka gaadheen hawlihii waxbarashadooda. Waa in lasii dhiirigaliyo sii wadida shaqo adeyga iyo in ayna isdhiganin si ayna uga hoos marin heerka fiican ee ay gaadheen.

## 4. Ardayda ka Hooseysa Heerkii laga rabay;

Ardayda ka hoos marta shaqadii looga baahnaa waxay u baahan yihiin caawin dheeraad ah si ay u soo gaadhaan arday ka hadheen ee fasalkooda. Waana in la siiyo cashiro iyo sharax dheeri ah, waa in fiiro-dheer loo yeesho intay fasalka joogaan, waa in la siiyo xilliyada fasaxa ah, biriftida iyo galinada dambe aqoon dheeri ah, loona sheego waalidiinta dhashay si ay u ogaadaan heerka waxbarashada caruurtooda, si ay iyaguna gacanb u siiyaan.

# Cutubka 2aad: Xoogaga Bedela Oogad dhulka, Waa=> 15, xisad

## Maxsuulka Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan;

- Inay sharaxaan xoogga bedela oogada dhulka iyo saameyntooda.
- Inay cabbiraan fogaanta iyo khariidad goobeeda.

| Kartida | Tusmada | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardayda waxay awoodi doonaan;<br>▪ Inay tilmaamaan xooggag duleedyada dhalan roga oogada dhulka.<br>▪ Inay fahmaan saameynada ay ku leeyihiin nabaad guurka hoos u dhaca oogada dhulka.<br>▪ Inay tilmaamaan xoogag gudaha ee dhalan badala oogada dhulka.<br>▪ Inay caddeeyaan saameeyta xoogaga gudaha ay ku leeyihiin oogada dhulka iyo nolosha aadamiga.<br>▪ Inay qeexaan cabirka (scale) .<br>▪ Inay magacaabaan hababka kala duwan ee lagu tibaaxayo iskeelka liniyeer ka ah ama cabir xariiqeedka.<br>▪ Inay xisaabaan cabirka gadisan (scale conversion) .<br>▪ Inay xisaabiyaan masaafada dhulka iyo | 2. Xoogga bedelka oogada dhulka.<br>2.1. Xoogaga duleed iyo ssaameynta ay ku leeyihiin nolosha aadamiga Waa=> 4, xisadood.<br>▪ Nabaad guur.<br>▪ Hoos-udhacyada meeleed ama tuulimaadka.<br>2.2. Xoogaga guudeed iyo saameynta ay nolosha aadamaha ku leeyihiin.Waa=> 5, xiso.<br>▪ Foolkaanayaasha.<br>▪ Dhul gariirada.<br>▪ Dillaacyada.<br>▪ Lab-laab.<br>2.3. Cabirridda fogaatna iyo khariidada dusheeda Waa=> 6, xiso .<br>▪ Macnaha cabirka ( scale).<br>▪ Muujinta hababka cabbir xariiqeedka.<br>▪ Bedelka cabbirka .<br>▪ Helidda masaafada goob ku taala khariidad .<br>▪ Bedka qaab qumanaha ah.<br>▪ Isbarbar dhiga halbeega cabbirka. | ▪ Weydii ardayda inay tilmaamaan wax nabaad guur ah oo jira haddeyn arkeen dhawaan iyo inay qoraal ka sameeyaan iyo inay yiraahdaan caradii laqaaday xagee la'geeyay . Inay sharaxaan waxa ugu wacaan hoos u dhaca carada.=> Marka xigta waxaad ku soo qaadaa habka baris/barashada daadadka soo mara babacyada buuraha ee xaaqa dhirta goboahaas ku taala. Sidoo kale soo qaado carada ay wabiyadu meel ku tuulaan, meelahaas oo loo isticmaalo dhul beereedyo.=> Ugu dambeyna waxaad weydiisaa ardayda sida ay nolosha aadamiga u saameeyaan caro-guur ka iyo carro-tuulka.=> Inay aqoosnadaan foolkaanayaasha bariga Afrika ee khariidada dusheeda ah iyo inay hubiyaan meesha ay tahay xudunka sare ee |

| | | |
|---|---|---|
| bed leh muuqaalo qaabkoodu caadi yahay oo xagga khariidada ah. | | foolkaanaha iyagoon adeegsanaya sawirol.<br>▪ Ardaydu inay ka sameeyaan sawiro jaantusyo ah oo muujinaya xudunta foolkaanaha, magmaha iyo laafaha ka soo butaacda xagga sare ee foolkaanaha .<br>▪ Marka xiga sharax in bariga Afrika uu ku yar yahay iyo in saxamada ay dhaqaaq ku jiraan. Ka dooda dooxada Riftiga iyo sida uu u saameeyo dhulgariirka oo ah sidii saxamo iskudhacaya ama qeyb ahaan dhaqaaq sameynaya. Waxaad sawirta dhillaaca uu sameeyo dhul gariirka.=> Adeegso jaantusyo si aad sawiro ugu muujiso dildillaaca dhaqaaqa xiliga uu socdo dhul gariirka iyo sawiro tusaya tusaalooyin bariga afrika ah.=> Tus arday sawirada hababka ( folding) iyo inaad weydiisid inay arkeen dhaadhaabo isdul baxay oo isku haabmay.<br>▪ Ka dood wax ay noqoneyso saameynta nolosha dadka ku agnool foolkaanaha, waxa ajira mid ku yaala karabiyaan oo layiraahdo Montserrat, |

| | | |
|---|---|---|
| | | meeshaas oo kala badh dadkii jasiiradda laga daad gureeyay sanadkii 1996. Waxaad raacisaa tusaale dalka ah oo layiraahdo 'Ertale'<br>▪ Ku naqtiin ardayda si ay furayaasha khariidada ay ku soo arkeen fasaalka 7aad ay u xasuustaan iyo inaad iyaga weydiiso si ay u tilmaamaan cabirka khariidada dusheed aha. => Hadda, weydi ardayda inay sameyso hawlahan soo socda tallaabo –tallaabo.<br>▪ Cabirka dhererka fasalka waxbarashada iyo diiwaan glaitiisa. => Cabirka ballaca iyo qoriddiisa.<br>▪ Cabirka iridda fasalka ballaciisa.=> Cabirka dhererka iyo ballaca kuraasta fasalka i.w.m.<br>▪ Waxaad go'aamisaa hableega wax lagu cabbirayo si loo adeegsado, ardaydana u sharax.=> Kadibna ha sawirto ardaydu khariidad gacmeed si loo cabiro kuraastooda tusaysa inay taalo meel sax ah. Hagaliyeen cabbir sahlan. => Waxaad sharaxdaa saddex dariiqo (statement, fractional iyo garaafigga) oo cabbirka wakiilka ah, |

| | | |
|---|---|---|
| | | sidaa awgeedna, waxay aqoonsan karaan noocyada cabbirka. => Ku xooji sharaxaaga tusaalooyin.<br>▪ Tus ardayda qeybta ah; 1: 50,000 ee khariidada iyo inay dib u eegaan cabbirkii ay ku soo arkeen Fasalka 7aad .<br>▪ Marka fasalku uu kashaqeynayo fogaanka meel ilaa meel kale, tusaale ahaan, sii ardayda tirooyin tusaalayaal kale.<br>▪ Ugu dambeyn tus ardayda maabka cabbirkiisu yahay 1: 10,000 oo ah bed iskumid ah, sidaa awgeed . Waxay isbarbar dhigi karaan qiyaasta cabbirka.<br>F. G. Hadda ardaydu ku nooshahay meel magaalo ah waxay heli karaan internet, waxayna eegi karaan dhulka google. |

# Qiimeynta

1. Baruhu waa inuu sameeyo qiimeyn joogto ah oo uu ku sameeyo shaqadda ardayda cutubkoo dhan, sameeyana isbarbardhig sharaxa soo socda ah, isagoo ku salaynaya ujeedooyinka gaarka ah si uu go’aan uga gaadho in ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa iyo in kale.

## 2. Ardayda gaadhey heerka shaqo ee looga baahnaa.

- Waxay awoodi doonaan; Inay tilmaamaan xoogaga duleedka ee bedela oogada dhulka; Inay xaqiijiyaan saameynaha nabaad guurka iyo tuulimaadka oogada dhulka iyo nolosha; Inay tilmaamaan xoogaga gudaha inay wax ka bedelaan oogada dhulka; Inay caadeeyaan saameynta ay xoogaga gudaha ay u geystaan oogada dhulka iyo nolosha Aadamiga .
- Inay qeexaan hal beegga qiyaasta cabbirka (scale) , ayna magacaabaan waddaayin kala duwan ooy ku tibaaxayaan iskeelka liniyeerka ah , ooy xisaabiyaan bedelaada cabbirka ( scale conversion) , ayna xisaabiyaan fogaanta dhulka iyo bedelka qaab qumanaha ah leh ee khariidada ku dulyaala.

## 3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiganin.

## 4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,

Waxay u baahan yihiin in la’siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la’siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.

# Cutubka 3aad: Farogalinta Dadka ee Garyiga.
# Waa=> 8, xisadood

## Maxsuulada Cutubka: Ardaydu waxay awoodi doonaan :

- Inay tilmaamaan sababaha iyo cawaaqibka ka dhasha waxyeelada gaadha khayraadka dabiiciga ah.
- Inay aqoonsadaan walxaha muhiimka ah ee diqeeyayaasha ah iyo hawsha lagaga hortagi karo.
- Inay fahmaan sababaha iyo saameynaha diirimaadka dunida.

| Kartida | Tusmayaasha | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan;<br>▪ Inay baadhaan waxyeelada gaadha khayraadka dabiiciga ah .<br>▪ Khayraadka daabiciga ah ee gayiga.<br>▪ Inay ka qeyb qaataan ilaalinta khayraadka dabiiciga ah ee goobahooda.<br>▪ Magacaw walxaha ugu waa weyn ee diqeeya biyaha iyo hawada.<br>▪ Inay fahmaan sababaha dhaliya kuleylka adduunka.<br>▪ Inay qiimeeyaan saameynta kulka dunida uu saameeyo dadka, dhirta dabiiciga ah iyo duurjooga. | **3.**Farsagalinta aadamiga ee gayiga.<br>3.1. Falgalka uu aadamigu layeesho khayraadka khayraadka daabiciiga ah ( Dhirta dabiciiga ah, biyaha , hawada iyo carada.) Waa => 4, xiso.<br>▪ Burburka kharyaadka dibiiciga ah iyo saameynta geyiga.<br>▪ Buluushanka ama diqawga biyaha iyo hawada iyo xalliyada suuragallada ah.<br>3.2. Koosiska ama sababaha iyo saameynta kulaylka adduunka .Waa=> 4, xisadood.<br>▪ Walxaha dhaliya saameynta diqawga sida: ( CFCs, CO, $CO_2$) | ▪ Weydii ardayda inay ka doodaan tusaalayaasha saameeya xaalifinta dhrita iyo beero falashada xun ee goobahooda iyo inay doodooda ku sawiraan caro-guurka , cimilada, lumidda noocyada iyo abaaraha .<br>▪ Waa inaad hubisaa laba xalaad daraasaadka labo wadan xaggooda ah sida; Burburinta ama burburka Amasoon ee keymaha rooban, kuwaas oo noqday kuwo wax beeristu xuntahay, kadibna loo adeegsaday kiimikooyin bacrineed oo faro badan iyo xaalufinta daaqa, nabaad guurka iyo lamadaagaanada bariga Afria.=> Kadood, diqawga hawada adiga iyo ardaydaba fiiriya tusaalooyinka; sida; Addis-Ababa , qiiqa baabuurta ay ku sii dhexdaayaan hawada magaalada, hadhaayada shidaalada wax lagu karsado iyo hawlaha warshadaha |

| | | |
|---|---|---|
| | ▪ Waxyeelada lakabka Oozonka.<br>▪ Baraf dhalaalka.<br>▪ Roob aysiidhka.<br>▪ Daadadka i.w.m. | sida; Dhibaatooyinka ka dhasha shaqooyinka shubka ama lataaban karo. Xaalada daraasad ah u soo qsaado warshadaha kiimikada ee dalka hindiya diqawgeeda.=> Hadda, waxaad kadoodaa diaqawyada biyaha sida; Bullaacadaha biyaha musqulaha qaada laakiin, waxaad u sharaxdaa halista ay leeyihiin khatarta kiimikooyinka loo adeegsado beraha sida inay diqeeyaal yihiin.<br>▪ Waxaad sharaxdaa in ayna faa'iido laheyn isticmaalka xaddi dhaafka ah ee dhirta iyo isticmaalka bacrinta ay dadku ku sumoobaan iyo xayawaankaba iyo sidoo kala dhulbiyoodka. Isticmaal tilmaama bacrimane kiisas ah ood ku sameeyso daraasad.<br>▪ Xusuusi ardayda in ay u baahan yihiin inay sifiican uga meydhaan oogadoda ay gaadhay kimikada iyo qudaarta, haddii ay ku arkaa wax ku hadhay kiimikooyinkaas. Dood fasal: Baabuurta waa diqeeyaal xoog badan, baabuur badana waxay ka yimaadaan jabuuti ooy soo galaan dalka, waxayna keenaan shilal badan. Markaa ardaydu mala tahay inay fikir fiican tahay in lagu bedelo dareen qaadi kara boqol baabuur xamuulkooda |

| | | |
|---|---|---|
| | | in lasameeyo? Kadooda “pros iyo cons”.<br>▪ Ardaydu waa inay aqoonsataa sababaha waa weyn ee diirimaadka dunida walxaha dhaliya sida; CFCs, CO, $CO_2$ iyo sameynta kulka dunida sida; waxyeelada lakabka oozoonka ($O_3$), heerka badaha oo kaca, roobab aysiidh ah oo da’a i.w.m.<br>▪ Ardaydu waa inay u wada shaqeyso siwada jir ah, kana doodo waxyeelada iyo saameynta kulka dunida uu ku leeyahay aadamiga, dhirta dabiciiga ah iyo nafleyda duurjoogga ah. => Xaalada daraasadeed ka dhig dhalaalka baraf weynaha, heerka badaha oo kaca iyo dabargo’a madax-kutida ku nool cidhifyada .=> Xaalad daarasadeed kadhig sida aan loo saadaalin karin cimilada iyo hawada xujmaaneysa sii kororkeeda, sida; duufaanada, sabeylaha xoogga badan, daadadka i.w.m. |

## Qiimeynta

2. Baruhu waa inuu sameeyo qiimeyn joogto ah oo uu ku sameeyo shaqadda ardayda cutubkoo dhan, sameeyana isbarbardhig sharaxa soo socda ah, isagoo ku salaynaya ujeedooyinka gaarka ah si uu go'aan uga gaadho in ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa iyo in kale.

## 2. Ardayda gaadhey heerka shaqo ee looga filayay

- Waxay awoodi doonaan; Inay baadhaan raadadka aan caqli galka aheyn eeloo geysto kharyaadka gayiga dabiiciga ah ; inay kaqeyb qaataan hawlaha dhawridda; inay magacaabaan hawada muhiimka ah iyo diqeeyaasha biyaha; inay fahmaan sababaha dhaliya diirimaadka dunida; inay qiimeeyaan sameynta uu ku leeyahay kulka adduunka aadamiga, dhirta iyo nolosha duurjooga ah.

## 3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiganin.

## 4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.

# Cutubka 1aad: Arrimaha Dadweynaha (Bulshada), Waa=> 19, xisadood.

## Maxuuslka Cutubka: Ardaydu waxay Awoodi doonaan;

- Inay fahmaan dhalinyaradu ladagaalanka HIV/AIDS-ka, ooy horumariyaan siyaasadda dadweynaha iyo sinaanta jinsiga.
- Inay sheegaan tusaalooyin iyo waddooyin looga fogaanayo ciyaal-suuqnimada.
- Inay sharaxaan ujeedooyinka ugu waa weyn iyo xeerarka lagu hagayo UN-ta iyo fikirka caalamka.

| Kartida | Tusmada | Waxqabadka Lafilayo |
|---|---|---|
| ▪ Ardaydu waxay awoodi doonaan;<br>▪ Inay horumariyaan xirfadaha nolosha kuwaas oo suurogalinaya la'dagaalanka HIV/AIDS-ka.<br>▪ Inay ku tartamaan shaqada kuwaas oo gacan siinaya, daryeelayana dadka qaba HIV/AIDS-ka. Iyo qoysaskooda.<br>▪ Inay baadhaan kororka dadka ee dalka.<br>▪ Inay aqoonsadaan tabaha lagu xakameynayo dhaqso u kororka tirada dadka.<br>▪ Inay horumariyaan waxqabadka siyaasadda dadweynaha iyo | 4. Arrimaha dadweynaha ( bulshada)<br>4.1. Arrimaha la'xidhidha dadweynaha Waa=> 9, xiso.<br>▪ Horumarinta xirfadaha nolosha; kacaaganaanta, iskacaabinta duufsiga asaagaaga, ka firkiradda mustaqbalkaaga.<br>▪ Diyaarinta dareelka iyo taageerida dadka qaba HIV/AIDS-ka.<br>4.1.2. Istiraatiijiyadda lagu yareynayo kororka dadweynaha.<br>▪ Geedi socodka kororka dadweynaha dalka.<br>▪ Istiraatiijiyadda loogaga hortagayo kororka dadka sida:- Guurka oo la'daaliyo, gabdhaha oo wax la'baro, qorshaha qoyska i.w.m.<br>▪ Doorka dhallinyarada ay ku horumarinayaan dadka iyo yarenta saboolnimada ee siyaasadda dalka.<br>4.2. Xuquuqda Adamiga iyo badbaadadiisa Waa=> 6, xisadood. | ▪ Ardaydu doodeeda iyo aqoonsiga saameynta HIV\AIDS-ka goobahooda.=> Inay ka doodaan ardaydu tiro koobyada ay baahisay laanta Caafimaadka adduunka " WHO' ee ku saabsan HIV/AIDS-ka., Ethiopia ioy dalalka kale .<br>▪ Kabaaraan daga labo waxyeelo oo uu leeyahay HIV/AIDS-ka. Mid wuu waxyeeleeyay, maxaa yeelay, khatartu waxay uga timid duufsiga da'diisa. Midka kalena, waxuu ku waxyeeloobay dhiig lagu shubay, u sharax ardayda inayna isdhihin waxaad qabtaan HIV/AIDS-ka. => Waxaad sharaxdaa duufsiga da'daada ay khatarta kuu horseedo, sida isugalmoodka xaaraanta ah, sigaar cabidda i.w.m iyo waliba |

| | | |
|---|---|---|
| istiraatijiyadda yareynta saboolnimada dalka.<br>▪ Inay kala soocdaan farqiga u dhaxeeya jandarka iyo jinsiga.<br>▪ Inay aqoonsadaan muuqaalada sinaanta ee jandarka.<br>▪ Inay fahmaan doorka dhallinyarada ka qaadan karto horumarinta sinaanta jinsiga.<br>▪ Inay warbixin ka sameeyaan iyo ka doodaan tusaalooyin ka muujinaya gaboodfalada iyo cabudhinta jinsiyeed ee goobahooda ka dhacda.<br>▪ Inay xaqiijiyaan awoodsiinta haweeka iyo inay si wada jir ah looga shaqeeyo yareynta saboolnimada.<br>▪ Inay caddeeyaan tusaalooyinka ciyaal suuqnimada.<br>▪ Qor wax ku saabsan arimaha ciyaal | ▪ Farqiga u dhexeeya jandarka iyo segaska iyo horumarinayo sinaanta jandarka.<br>▪ Wada shaqeynta ah si loo yareeyo saqboolnimada.<br>▪ Awoodsiinta haweenka iyo in laga dheeraado shaaqo gobood falada dagaanka iyo cabudhinta.<br>▪ Doorka arrimaha jinsiga la'adeegsanayo.<br>4.2.2. Ilaalinta rabshooyinka sameynta, daroogo isticmaalka, dhaqan xumada, Kufsiga i.w.m.<br>kafogaanshaha ciyaal suuqnimada iyadoo la adeegsanayo wacyigalin, la'iska caafiyo duufsiga kuwa dhanka xun,in waqti lagu lumiyo goobaha madadaalada, in fikir wadaag la'la sameeyo qoysaska.<br>4.3.1. Barnaamijka iskaashiga Waa=> 3, xiso.<br>▪ Ujeedada iyo xeerarka UN-ta iyo ururadeeda caalamiga ah.<br>4.3.2. Caalamka Waa=> 2,. Xiso.<br>▪ Fikirka caalamka.<br>▪ Fursadaha iyo loolanada xagga ganacsiga, dhaqanka, xogta ama warbaahinta. | weydii ardayda inay soo jeediyaan wixii wax lagaga qabanayo arinkan.<br>▪ Ardaydu hadaristo xogtii ugu dambeysay ee dadweynaha laga helay iyo inay weydiiyaan geedi socodka, qeyb yar oo fasalka kamid ah.<br>▪ Ardayda waydii waalidiintooda ama waayeelka kale imisa caruur ah ayaa celceliskooda uu ahaa soddonkii sano ee lasoo dhaafay.<br>▪ U kuurgal, tirada qoyska ee goobaha miyiga ah marka loo eego qoyska kunool magaalada Addis-Ababa , iyo cidda dhawaan guursatay.=> Kadood,fikradda ku saabsan inguurka dib loo dhigo, qoyskana wax labaro iyo in lasamaeeyo qorshaha qoyska, ee laxidhiidha yareynta saboolnimada kala dood sida loo xakameynayo dadka kororkiisa ama inayna wax ka tareynin yarenta saboolnimada .<br>▪ Ardaydu hakadoodo iyo hana aqoonsato doorka iyo mas'uuliyadda ay ka qaadan karaan caawinta hagaajinta mustaqbalkooda.<br>▪ Kuurgal, istiraatiijiyadda dadweynaha dalka shiinaha. |

| | | |
|---|---|---|
| suuqnimada ee goboaha dugsigu kuyaal.<br>▪ Inay sharaxaan ujeedooyinka iyo xeerar lagu hagayo UN-ga.<br>▪ Inay aqoonsadaan ururada muhiimka ah ee UN-ta iyo ujeedadooda.<br>▪ Inay aqoonsadaan fikradaha caalamka.<br>▪ Inay aqoonsadaan fursadaha jira iyo loo lanada xagga ganacsiga ah, warbaahinta ah, iyo dhaqakna ah. | | ▪ Waxaad ladoodaa waxii suurogal ah ee waxgaradka haweenka dagaanka uu dugsigu ku yaalo kunool. Weydii ardayda inay waxay la'tahay ay kasheegaan, tayada haweenka waxay soo bandhigaan ee ku saabsan labka iyo dhedigaba.<br>▪ Weydii ardayda inay la tahay in waddan ka dhaqaalahiisa ama ilihiisa dhaqaale ay yihiin khasaare aan qiime lahayn ilaa iyo waxbarashada loo simo wiilasha iyo gabdhaha.<br>▪ Weydii ardayda inay la'doodaan haddii haweenka ay awoodaan inay wax u qabtaan sida ragga wax u qabta weydii sida ay wax ula falgali karaan iyo sababta, haddii ay duulimaadka diyaaradaha ay shaqo kehesho oo ay tiraahdo duuliyaan ah.<br>▪ Nuxurka dooda waxaad ka dhigtaan gabadh Afrika ah oo duuliye diyaaradeed ah.<br>▪ Ardaydu hakadoodo sidii ay anshaxooda ugu saameyn lahaayeen dadka kale si sinaan ah.<br>▪ Weydii ardayda inay ka doodaan gabood falada iyo cabudhinta lagu sameeyo haween iyo |

| | | |
|---|---|---|
| | | gabdhaha ee ku nool dagaanka uu dugsigu ku yaalo iyo sida loo la dhaqmo ooy wax kasheegaan.<br>▪ Ardaydu waa inay ka doodaa tusalaooyinka leh anshax xumada ee ka dhaca goobahooda iyo sababta ay u maleynayaan waxyaalaha kalifa inay dhacaan. Maxaase lagu hagaajin karaa?.<br>▪ Ka doodaa rabshadayaashaas iyo Dhibaatooyinka ay u gesytan hantida. => Weydii ardayda haddii qaadan jireen daroogada ama cabidda alkolada sida ay u arkaan dadka kale arinkaasi. => Kadood istiraatiijiyada lagaga fogaanayo isduufsiga dadka yar yar. Sharaxna kabixi haddii la xidhiidhka qoysasku ay ku caawinayaan. => Ka dooda qadarinta haweenka iyo qiimaha uusiiyay dhaqanku iyo waxa aan laga aqbali karin.Weydii arday sida ay dareemayaan haddii waalaalhooda gabdhaha ah xumaan loogeysto iyo sida loo la'dhaqmayo haddii haweenka weerar lagu sooqaado.=> Xaalad daraasadeed ka dhig nin yar oo ku kacay kufsi lagana akhriyay |

| | | |
|---|---|---|
| | | wargeysyada .=> Weydii arday waxay ka yaqaaanin jemceedda quruumaha ka dhexysa .<br>▪ Waxaad sharaxdaa ujeedooyinka iyo xeerarka jimceedda quruumaha midoobay iyo inaad sawirto, kuna qorto sabuuradda dusheeda (sida; xafiiska golaha guud, golaha ammaan, maxkamadda caalamiga ah ee caddaladda, golaha dhaqaalaha iyo bulshada). => Xaalad daraasad ka samee faragalinta UN-ta. Fiiro gaar ah, faahfaahin dheeri ah waxaad ku heli kartaa website-yada.<br>▪ Hordhaca ugu samee wax uu yahay erey, kadibna weydii wax loola jeedo. Waxaad ku dulqortaa sabuuradda qeybaha kala ah sida; Farsamada casriga ah, ganacsiga, warbaahinta iyo dhaqanka. => Xaalad daraasad ka dhig wax loo yaqaano maykroosooft (Microsoft) ee uu ku shaqeeyo kombiyuurtarka, kaas oo ah farsamo shirkado umad badan ledahay oo laga heli karo wararka caalamka.<br>▪ Adduunkoo dhan sii wada saameynta dooda taas oo caawineysa |

| | | |
|---|---|---|
| | | helitaanka xogaansho lasameeyo oo ah xagga internetka, taas oo noqonaysa shantiisano gudahooda mid caan ah iyo in lahelo telefoonada gacanta eel oo yaqaano (Mobiles). => Weydii ardayda waxa kale ee laamo ah, islamarkaana caalami ah ee ay yaqaanaan sida: cocacola.<br>▪ Weydii ardayda inay sameeyaan baahis cilmiyeed, shirkadda ka hawlgasha bunka dalka iyo suuqa caalamiga ah. SIdee buu waxeelo u gaadhsiiyay kuwan qiime barbarka ka jira suuqaqa caalamiga ah. Tusaale: shirkadee kula tartanta soo saaridda iyo suuqeynta caalamiga ah? iyo wadamada ay yihiin.=> Dhaqanka iyo isgaarsiinta: maxaa saameyn ah ooy ardaydu filaysaa wax ka qabashada kororka ka qeybgalka warbaahinta caalamiga ah iyo internet-ka ee ay halayso bulshadu? Miyayse u malaynayaan middaas inay fureyso fikrado muhiim ah? |

## Qiimeynta

1. Baruhu waa inuu sameeyo qiimeyn joogto ah oo uu ku sameeyo shaqadda ardayda cutubkoo dhan, sameeyana isbarbardhig sharaxa soo socda ah, isagoo ku salaynaya ujeedooyinka gaarka ah si uu go'aan uga gaadho in ardayda gaadhay heerkii shaqo ee looga baahnaa iyo in kale.

## 2. Ardayda gaadhey heerka shaqo ee looga baahnaa:

- Waxay awoodi doonaan; Inay horumariyaan xifadaha nolosha oo u suuro galinaya inay kula dagaalamaaan HIV/AIDS-ka , inay kordhiyaan ooy isku dayaan daryeelka iyo taageerada shaqo ee lasiinayo dadka qaba HIV/AIDS-ka iyo qoysaskooda, inay baadhitana ku sameeyaan socodka badashada dadweynaha dalka, inay caddeeyaan/aqoonsadaan tabaha lagu yareynayo dhaqso u kororka dadka, inay horumariyaan muhiimadda siyaasadda bulshada . Inay ogaadaan siyaasadda yareynta saboolnimada, inay kala soocaan jendarka iyo sex-ka, inay aqoonsadaan muuqaalada sinaanta jinsiga. Inay qiimeeyaan doorka dhalinyarada ee kuwaajihan sinaanta jinsiga. Inay warbixin ka sameeyaan goboodfalada iyo cabudhinta lagu lakaco goobahooda, inay aqbalaan muhiimmada awoodsiinta haweenka iyo wadashaqeynta lagu yareynayo saboolnimada , inay caddeeyaan tusaalooyinka ciyaal suuqnimada oo tilmaamaan sida looga fogaanayo, ooy warbixin ka sameeyaan goobaha ay ka jiraan rabshooyinka dhaqan xumada; Inay sharaxaan ujeedooyinka iyo xeerarka lagu hago UN-ta .
- Inay aqoonsadaan fikirka caalamiga ah ayna aqonsadaan fursadaha jira loolamada xagga ganasiga caalamka ka jira iyo inay oogadaan warbaahimada iyo dhaqana jira i.w.m.

## 3. Ardaydu shaqadeedu ka sarreyso heerkii looga baahnaa,

Waa in lagu ammaano loona aqoonsado guusha ay gaadheen, waa in lagu dhiirigaliyo inay sii wadaandadaalka shaqo iyo inayna isdhiganin.

## 4. Ardayda ay shaqadeedu ka hooseyso heerkii looga baahnaa,

Waxay u baahan yihiin in la'siiyo caawin dheeri ah, si ay u gaadhaan fasalka ay ka hadheen, waana in la'siiyo fiiro dheeri ah inta ay fasalka ku jiraan iyo cashiro dheeraad ah waqtiyada birirfta ama galinada dambe ee maalintii.